JAMHUURIYADDA SOMALILAND | REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 7aad* | *Cadad Gaar ah* | *03/11/2018* |



## DHAQAN-GALKA XEERKA QANDARAASYADA QARANKA
## XEER LR.82/2018


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2018*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-207/102018 Taar: 07/10/2018

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Qandaraasyada Qaranka**
**Xeer Lr. 82/2018**

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-37/808/2018, eek u taariikhaysan 18/09/2018, ujeeddadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Xeerka Qandaraasyada Qaranka;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad, 76aad, ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Qandaraasyada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 82/2018.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## Go'aanka Ansixinta Xeerka Qandaraasyadda Qaranka

## (Xeer Lr.82/2018)

**Markuu arkay:-** Qodobka 11aad, 22aad ,53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad ,113aad, ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Aqoonsaday:-** In aanu hore jirin nidaam Qabdaraas bixinta Qaranka oo la jaanqaadi karra heerarka caalamiga ah iyo wakhtigan casriga ah kuna haboon habraaca loo marayo ama lagu maamulayo Qandaraasyada.

**Markuu Aqoonsaday:-** Baahida loo qabo in la helo Xeer lagu maamulo Qandaraasyada Qaranka oo la jaanqaadi kara heerarka caalamiga ah iyo xaalada dhaqan-dhaqaale oo waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Markuu Arkay:-** Baahida loo qabo in la helo Sharci loo raaco bixinta Qandaraasyada ka baxaya Miisaaniyada dhexe ee Dawlada, dawlado kale inagu caawiyaan ama inna deymiyaan si ay noqdaan kuwo daah-furn oo cadaalad ah.

**Markuu Garawsaday:-** Muhiimadda ay leedahay in la helo nidaam loo raaco bixinta iyo u tartamida Qandaraasyadu taas oo kor u qaadi karta sinaanta dhaqaale, siyaasadeed iyo koboca dhaqaale.

| | |
|---|---|
| **MARKUU U ARKAY:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:82/2018** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaad **13/05/2018.** |
| **MARKUU U ARKAY:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:82/2018** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhsanayd **11/08/2018** |
| **MARKUU U ARKAY:-** | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyay kuna ansixiyeen afartan **(40)** cod **Xeerka Qandaraasyadda Qaranka** |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo shan iyo afartan **(45cod)** mudane oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Qandaraasyadda Qaranka (Xeer Lr. 82/2018).**

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Axmed-yasin Sh. Cali Ayaanle |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada | K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada |

# Golaha Wakiilada JSL

**Markuu arkay: -** Qodobka 11aad, 22aad, 53aad, 54aad, 55aad, 77aad, 78aad iyo 113aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu aqoonsaday: -** In aanu hore jirin nidaam Qabdaraas bixinta Qaranka oo la jaanqaadi karra heerarka caalamiga ah iyo wakhtigan casriga ah kuna haboon habraaca loo marayo ama lagu maamulayo Qandaraasyada.

**Markuu aqoonsaday: -** Baahida loo qabo in la helo Xeer lagu maamulo Qandaraasyada Qaranka oo la jaanqaadi kara heerarka caalamiga ah iyo xaalada dhaqan-dhaqaale oo waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Markuu Arkay: -** Baahida loo qabo in la helo Sharci loo raaco bixinta Qandaraasyada ka baxaya Miisaaniyada dhexe ee Dawlada, dawlado kale inagu caawiyaan ama inna deymiyaan si ay noqdaan kuwo daah-furn oo cadaalad ah.

**Markuu garawsaday: -** Muhiimadda ay leedahay in la helo nidaam loo raaco bixinta iyo u tartamida Qandaraasyadu taas oo kor u qaadi karta sinaanta dhaqaale, siyaasadeed iyo koboca dhaqaale.

**Markuu: -** Ka baaraan degay, ka dooday, isla markaana falanqeeyay in xeerkan ku haboon yahay Qandaraasyada Qaranka.

**Wuxuu Ansixiyay**

Xeerka Qandaraasyada Qaranka
***Xeer* Lr. 82/2018**

## QAYBTA 1AAD
## QODOBADA HORDHACA AH

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **"Xeerka Qandaraasyada Qaranka ee Xeer Lr.82/2018"**

### Qodobka 2aad
### Eray-Bixin

Xeerkani, haddii aanu nuxurka si ka duwan u dhigayn ereyadani waxay yeelanayaan macnaha soo socda: -

**Adeegyada Farsamo**: - Waxa loola jeedaa adeeg kasta oo farsammo oo keenaya wax soo saar la taaban karo.

**Adeegyad:-** Waxaa loola jeedaa waxqabad kasta oo asal ahaan maskaxda laga qabto, kaasi oo aan lahayn wax soo saar la taaban karo.

**Badalaad/Tuurid (Disposal):-** Waxaa loola jeedaa iibinta ama tuurida alaabooyinka aan la hagaajin karin, duugoobay ee aan la isticmaali karin iyo qalabka ku ah dheeraadka hay'adaha dawlada.

**Badeecad**:- Waxaa loola jeedaa alaabooyinka nooc kasta iyo sifada oo ay ku jiraan badeecooyinka, alaabada qaydhiin, wax soo saarka iyo qalabka, iyo walxa adkaha ah, dareeraha ama qaab hawo ah.

**Damaanada Naadada**:- Macnaheedu waxa loola jeedaa ogolaanshaha baanka ama qaab kale oo damaanad ah oo uu soo gudbiyay tartamuhu oo ay la socoto naado lagu illaalinayo waajibaadka tartamaha ka qaybqaadanaya nidaamka qandaraas bixinta, oo ay ku jirto

| | |
|---|---|
| | waajibka la saxeexayo heshiiska qandaraaska haddii naadada la aqbalo, iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dajiyay Xeerka iyo waraaqaha naadaynta. |
| **Faraca Qandaraasyadda**:- | Waxaa loola jeedaa unugga laga sameeyo hay'adaha qaranka kaas oo u qaabilsan qorshaynta qandaraasyadda; |
| **Gudashada Damaanada**:- | Waxaa loola jeedaa ogolaanshaha baanka ama qaab kale oo damaanadeed ah oo uu soo gudbiyo ganacsaduhu, qandaraaslahu ama la taliye si uu u illaaliyo waajibaad kooda ku xusan heshiiska qandaraas bixinta, iyadoo loo eegayo waxyaabaha looga baahanyahay waraaqada naadinta. |
| **Guddida**:- | Waxaa loola jeedaa Guddida Qandaraasyada Qaranka ee lagu abuuray Xeerkan, Qodobka 14aad ee Xeerkan. |
| **Gudida Qandaraas Bixi** | Waxaa loola jeeda guddida qiimaynta codsiyadda iyo naadada lagu dhisay Qodobka 29aad ee Xeerkan. |
| **Haay'ada Qandaraaska Iska Leh:-** | **W**axaa loola jeedaa hay'ad kasta oo qaran oo loo qaadayo qandaraas si waafaqsan Xeerkan. |
| **Hay'adaha Qaranka**:- | Waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo wax laga siiyay qoondaynta miisaaniyadda iyo masuuliyada qorshaynta iyo isticmaalka lacagahan waxaana ka mid ah kuwan soo socda: Wasaaradaha Dawladda Dhexe iyo Waaxahooda iyo |

Wakaaladahooda, Golayaasha Deegaanka, wakaaladaha Qandaraas hoose la siiyay, shirkadaha dawladdu leeyahay, hay'adaha Sharci dajinta, hay'adaha dawladda, iyo hay'ad kasta oo gaar ah oo looga qoondeeyay miisaaniyadda lacag.

**Heshiis**:- Waxaa loola jeeddaa heshiis qoran oo u dhaxeeya Hay'ada qandaraaska iska leh iyo ganacsadaha, qandaraaslaha ama la-taliyaha ku guulaystay qandaraaska.

**La-taliye**:- Waxaa loola jeeddaa adeeg bixiyaha bixiya adeegyo maskaxeed, oo ay ku jiraan adeegyada la talintu.

**Miisaniyadda Qaranka:** Waxaa loola jeedaa il kasta oo dhaqaale oo ka mid ah miisaaniyadda Dawladda oo ay ku jiraan daymaha iyo deeqaha caalamiga ahi.

**Musuqmaasuq, Khiyaano, Mu'aamarad (wada shirqool) (collusion), Khasab, ama Carqaladayn:-** Waxay yeelanayaan macnayaasha sida lagu xusay Qodobka 16aad iyo Xeerka Ka hortaga ku tagri falka Hantida Qaranka 38/007.

**Naado**:- Waxaa loola jeedaa qiime-sheeg ama qorshe dalab oo uu soo gudbiyey tartamuhu isagoo ka jawaab celinaya dalabka Guddida Qandaraasyada Qaranka;

**Qandaraas:-** **W**axaa loola jeedaa gacan ku dhigista ama hanashada macno kasta oo heshiis alaabeed, dhismayaasha, adeegyo maskaxeed ama adeegyo kale qodobadana waxaa loo haysanayaa in lagu daray heshiisyada iyo badalaada/tuurida.

**Qandaraasle**:- Waxaa loola jeedaa qof sharci ama qof dabiici ah kaas oo ay la gashay heshiis Hay'ada Qandaraas iska leh.

**Qoraalada Qandaraaska**:- Waxaa loola jeedaa qoraalada dalabka doonitaanka, dalabka qorsheyaasha ama qiime-sheegyo iyo waraaqo kale oo ay soo saartay Guddidu iyadoo lagu salayn doono diyaarinta ay sameeyaan tartamayaashu.

**Qorshaha Qandaraasid** Waxaa loola jeedaa qorshaha ka kooban heshiisyo la soo jeediyay in la qandaraaso oo ay soo diyaariyeen Hay'ada Qaranku;

**Sarkaal Dawladeed:-** Waa qofka haya ama ka shaqaynaya xafiis bixiya mushahar loogu adeego dawladda, oo ay ku jiraan saraakiisha ama maamulo heer kasta Dawladda Hoose ah.

**Shuruudaha tixraaca:-** **W**axaa loola jeedaa dokumentiga ay diyaariyeen Hay'ada Qandaraska iska leh ama Gudiddu oo qeexaya shuruudaha shaqo ee looga

baahan yahay in la sameeyo Lana heli karo. Lana tixgeliyo in la qaado masuuliyadaas iyo sidoo kale sida natiijada laga filayaa tahay.

**Tartame Guulaystay:-** **W**axaa loola jeedaa tartame dalabkiisa la aqbalay ka dib markii loo tixgeliyay tartamayaasha kii ugu mudnaa farsamo ahaan iyo dhaqaale ahaan. Waxa sidoo kale looga jeedaa tartamaha hay'ada qandaraaska iska leh ay la gashay heshiiska.

**Tartame**: - Waxaa loola jeedaa ka qayb-qaate kasta ama ka qaybqaate ay suurowdo in uu ka qayb galo tartanka qandaraas bixinta.

**Wareegtooyin**:- Waxaa loola jeedaa wareegtooyinka ay soo saaraan Guddidu si uu u guto ahdaafta una fuliyo qodobada Xeerkan.

## Qodobka 3aad
## Ujeedooyinka Xeerka

**1.** Ujeedada Xeerkani waa in la abuuro qaab-dhismeed hay'addeed oo maamula qandaraasyada qaranka iyo in la helo hab-raaca bixinta qandaraasyada alaabta, dhismayaasha, adeegyada iyo qodobada kale ee heshiiska ah iyo badalaada alaabada aan la hagaajin karrin ama xumaaday ama kaydka dheeraadka ah iyo qalabka ee ay isticmaalaan hay'addaha dawladdu.

**2.** Iyada oo aan waxba loo dhimayn ujeedooyinka xeerka ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan, Xeerkan waxaa loogu tallo-galay: -

a) In la kordhiyo habsami uga faa'iidaysiga dhaqaalaha iyo hufnaanta qandaraas bixinta

dawladda, lanna helo qiime galka ugu sareeya ee lacagta.

b) In si siman loo helo fursadaha qandaraasyada iyo xogtooda, si kor loogu qaado daah-furnaanta iyo u tartamida qandaraasyada.

c) In kor loo qaado kalsoonida, cadaalada, aqoonta iyo isla-xisaabtanka si loo kordhiyo aaminadda dadweynaha ee nidaamka qandaraas bixinta.

## Qodobka 4aad
## Xadka Adeegsiga Xeerka

1) Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan qandaraas bixinta iyo iibka badeecadaha, dhismayaasha iyo adeegyada, badalaada/tuurida alaabada aan la hagaajin karin, duugoobay ama badeecadaha iyo qalabka dheeraadka ah ee ay sameynayaan Guddida Qandaraasyadda Qaranka, ama hay'adaha dawlada dhexe, kuwa heer gobol iyo heer degmo iyo shirkadaha qayb ahaan ama gabi ahaan ay leedahay dawladdu iyo hay'ad kasta oo gaar loo leeyahay oo la siiyay masuuliyad ay ku fuliso mashaariic horumarineed oo laga maalgaliyay miisaaniyadda dawladda.

2) Qandaraas bixinta qaranka ee ku jira Miisaaniyada Dawladda waxa ka masuul noqon doona Guddida Qandaraasyadda Qaranka.

## Qodobka 5aad
## Laguma Dabaqayo/Dhaqayo

1) Xeerkani sinaba lloguma adeegsan karo arimahan hoos ku xusan:-

a) Hadii qodobada xeerkani ay iska horyimaadaan qodobada heshiis ama sharciyada iibka ee hay'ad deeq-bixiye kuwaasi oo ku jira heshiis ay dawladu gashay, qodobada heshiiiskasi ama sharciyadaasi iibka ayaa lagu dhaqmayaa. Dhamaam xaaladaha kale oo dhan iibka iyo qandaraasyada waxa lagu dhaqayaa xeerkan.

b) Qandaraas bixinta la xidhiidha qalabka Ciidanka ama amaanka qaranka iyadoo loo hoggaan samayo qodobada soo socda:-

i. Haddii Wasiirka ka masuulka ah Difaaca, ama madaxa wakaalad kasta oo amaan ee dawladdu uu go'aamiyo in wax kasta qandaraas bixin ah oo xidhiidh la leh difaaca dawladda ama amaanka dawladda uu u baahanyahay isticmaalka habraac gaar ah, nidaamada lagu xusay xeerkan waxaa wax ka badali kara Guddida ujeedo cayiman dartii, laakiin wax ka badal kaasi waxaa si adag u maamuli doonaa tixgelimo la xidhiidha difaaca ama amaanka.

ii. Si waafaqsan ujeeda xarafka (b) (i) ee qodobkan, iibka iyo qandaraasbixinta waxyaabaha ay ka mid yihiin alaabooyinka guud, dirayska, agabka yar yar iyo qalabka xafiisyada, iyo gaadiidka caadiga ah ee ciidamada iyo hay'adaha ammaanka looma arki doono in ay la xidhiidhaan difaaca iyo amniga qaranka

iii. Gudida Gandaraasyada Qaranku iyagoo la tashanaya hay'adda qandaraaska iska leh ee u xilsaaran difaaca ama amniga qaranka, waxay samayn kartaa nidaam la xidhiidha qandaraas bixinta hawlaha ciidanka iyo amniga qaranka.

## Qodobka 6aad
## U-qalmid La'aanta (Non-Eligibilty)

1. Badeecadda, ganacsatada, qandaraaslayaasha iyo la taliyayaasha ka yimaada wadamada looma adeegsan karo tixgelinta Xeerkan haddii:
   a) Sharciga Soomaaliland ama wareegto rasmi ahi ay mabnuucdo xidhiidhka ganacsi ee lala yeelanayo wadankaasi khaaska ah, iyo/ama
   b) Go'aan Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ay ka qaadatay Cutubka VII ee Cahdiga Qaramada Midoobay kaasi oo mamnuucaya macaamillaad kasta oo la yeelanayo wadankaasi khaaska ah.Shirkad la gashay Hay'ada Qandaraas bixinta si ay u siiso adeeg latalin ah diyaarinta ama hirgelinta mashruuc iyo cid kasta oo ku xidhan

uma qalmaan inay ka qayb qaataan qandaraasida alaabada, dhismaha, iyo adeegyada kale ee la xidhiidha mashruuca, marka lagga reebo xaaladaha mashruuc dhan ama naqshada heshiisyada dhismaha.

2. Shirkada la gashay Hay'ada Qandaraaska iska leh si ay u siiso alaabo, shaqo dhisme ama adeegyo farsameed, iyo wax kasta oo ku xidhan uma qalmaan inay siiyaan adeegyo talo ah diyaarinta ama hirgelinta mashruuca, marka laga reebo xaaladaha mashruuc dhan ama naqshada heshiisyada dhismaha.

## Qodobka 7aad
## Ilaalinta Deegaanka iyo Caafimaadka Bulshadda

Marka la bixinayo qandaraasyadda, hay'addaha dawladu waa in ay hubiyaan isla markaana xil gaar ah iska saaraan ilaalinta deegaanka iyo bulshada, isla markaana alaabta la dalbanayo aanay ku jirin badeeco wax u dhimaysa deegaanka iyo caafimaadka bulshada kuwaaas oo ay soo cadeeyeen hay'adaha dawlada u qaabilsani.

## Qodobka 8aad
## Adeegsiga Nidaamka Iswadda ee Qandaraas Bixinta (Electorooniga ah)

Guddida Qandaraasyada Qaranku waxay u adeegsan karaan habka qandaraas bixinta nidaamka iswadda (automated) ee electarooniga ah, kuwaas oo ay ku jirayaan baahinta qandaraaska, soo gudbinta codsiyadda, iyada ay shardi tahay in nidaamkaasi yeesho damaanad la isku halayn karo loona siman yahay adeegsigiisa.

## Qodobka 9aad
## Wadaag

Tartamayaasha qandaraasyaddu waxa ay xor u yihiin in ay iskood u soo codsadaan qandaraaska ama ay iska kaashadaan shirkad wadani ah ama mid ajnabi ah.

**Qodobka 10aad**
**Xirafyahanada Shaqada Qandaraas Bixinta**

Shaqooyinka la xidhiidha qandaraas bixinta waxa fulin doona shaqaale loo tababaray oo aqoon iyo khibrad u leh hawsha qandaraasyada, si waafaqsan shuruudaha aqooneed iyo hagayaasha ay sameeyaan Guddida Qandaraasyadda Qaranku.

**Qodobka 11aad**
**Tababarka Shaqaalaha Qandaraasyadda Ku Lugta leh**

1) Iyadda oo la raacayo ahmiyadda Qodobka 10aad, Xukuumaddu waxa ay xil gaar ah iska saari doontaa, awood-dhisida, kobcinta aqoonta, iyo xirfadaha la xidhiidha qandaraasyadda, iyo maamulka fulinta heshiiyadda.
2) Waxa la dhisi doonaa machadyo u gaar ah tababaradda iyo kobcinta aqoonta ee shaqaalaha hay'adaha dawlada iyo Guddidaba;

**Qodobka 12aad**
**Luuqada**

Waraaqaha loo isticmaalo nidaamyadda qandaraaska waxaa lagu qori doonaa luuqada Af-Soomaaliga ama/iyo Ingiriisiga.

**Qodobka 13aad**
**Wareegtooyinka Qandaraas Bixinta, Hagayaasha iyo Buuga Tusmada (Manuals)**

1) Guddida Qandaraasyada Qaranku wuxuu samayn doonaa wareegtooyin uu ku daabacayo Faafinta Dawladda si uu u guto hadafyada si wanaagsana uu u fuliyo qodobada Xeerkan ee xidhiidhka la leh qodobada Xeerkan ku waasi oo lagu xusay inay shardi u ahaadaan Wareegtooyinkan.
2) Guddida Qandaraasyadda Qaranku wuxuu soo saari doonaa taxadar ahaan isticmaalayaasha ku xusan Xeerkan heerka habsami ee naadada laga rabo, waraaqaha codsiga, qaab-beega qorshaha codsiga dalab, hagayaasha iyo buugta tilmaanaha ah ama qoraalada (standard biding, and proposal documents, formats of

procurement plans, guidelines and manuals) la xidhiidha kuwaas oo burinaya ama aan si kalaba ula jaanqaadi karin qodobada Xeerkan ka mid ah waxa ay ahaan doonaan waxba kama jiraan.

**Qodobka 14aad**

**Khiyaanada iyo Musuq-Maasuqa**

1) Dhammaan dhinacyadu waa inay u hogaansanaadaan heerarka ugu sareeya ee hab-dhaqanka anshaxa (highest ethical standards) inta lagu gudo jiro habraaca qandaraas bixinta iyo fulinta heshiiska.

2) Waxa mamnuuc ah xaalad kasta oo ku lug leh musuq-maasuq, khiyaamo, qasbid ama talaabo kasta oo carqalad ku ah habka qandaas bixinta oo ay ku kacaan masuuliyiinta dawladda, tartamayaasha, ganacsatada, qandaraaslayaasha ama la la-taliyayaashooda iyo kuwa iyaga qandaas-hoosaad ka sii qaata.

3) Guddida Qandaraasyadu waxay diidi karaan tartamaha ku guulaystay qandaraaska, haddii la xaqiijiyo in tartamuhu si toos ah ama si dadban ugu lug yeeshay musuqmaasuq, khiyaamo, qasab ama hab-dhaqanada mu'aamarad ah.

4) Guddida Qandaraasyaddu haddii ay u cadaato in shirkad, ama shakhsi ku kacay falalka ku xusan farqadda hore, waxa ay ku dari doonaan liistada aan loo ogolayn in ay u tartamaan qandaraasyada dawlada si waafaqsan Qodobka 53aad ee xeerkan.

4) Iyada oo la fulinayo ujeedada Xeerkan, naadada iyo waraaqaha dalabka qorshaha iyo heshiisyada lawada galay waxaa lagu dari doonaa:-

a) Shuruud looga baahan yahay in tartamayaasha, ganacsatada, qandaraaslayaashu inay u ogolaadaan saraakiisha Guddida Qandaraayada Qaranka iyo masuuliyiinta dawladda ee ay khuseyso inay baadhaan xisaabaadkooda iyo raad-reebkooda/diwaankooda iyo waraaqaha kale ee la xidhiidha gudbinta naadada iyo fulinta heshiiska,

taas oo ay baadhis iyo hubin ku samayn karaan Hantidhawraha Qaranka.

b) Shuruud looga baahan yahay tartamayaashu in ay ku daraan macluumaad ay ku xaqiijinayaan in ay si dhamays tiran u ilaalin doonaan shuruucda khuseeya tartanka iyo fulinta heshiiska isla markaana ka dheeraan doonaan nooc kasta oo khiyaamo, musuqmaasuq iyo mu'aamarad ku lug leh sida ku qeexan Farqadda 2aad ee isla Qodobkan.

## QAYBTA 2AAD
## GUDDIDA QANDARAASYADDA QARANKA

### Qodobka 15aad
### Assaasida Guddida Qandaraasyada Qaranka

1) Waxaa Xeerkan lagu aas-aasay Guddi madax bannaan oo loogu yeedhi doono Gudida Qandaraasyada Qaranka.

2) Gudidu waxay yeelanaysaa jiritaan qaanuuni ah iyo shaambad u gaar ah, waxayna ku dacwayn kartaa laguna dacwayn karaa magaceeda.

3) Gudidu waxay yeelanaysaa awooda masuuliyadeed ee maamulka dhammaan qandaraasyada qaranka iyada oo la raacayo Xeerkan.

4) Gudidu waxay heli karaan, gacanta ku hayn karaan, maamuli karaan ama soo bandhigi karaan hanti kasta oo guurto ama ma guurto ah oo xidhiidh la leh fulinta shaqadooda, sidoo kale waxa ay geli karaan heshiisyo iyo macaamil, taas oo si toos xidhiidh ula leh shaqooyinkooda.

### Qodobka 16aad
### Ujeedada Guddida

Ujeeedada loo aasaasay Guddidu waa: -

1) Sidii la isu waafajin lahaa nidaamka qandaraas bixinta Qaranka, loona xaqiijin lahaa in la gaadho ujeedada Xeerkan, iyo

2) In lagu dadaalo in si nidaam ah qandaraas bixinta qaranku noqdo mid la jaanqaadi karra heerarka caalamiga ah.

## Qodobka 17aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddida

1) Guddidu iyada oo fulinaysa waajibaadka uu farayo Xeerkani, waxa ay qabanaysaa shaqooyinkan soo socda: -

a) Faafinta, dabagalka iyo ku dhaqanka Xeerkan.
b) dajinta, kor u qaadida, taageerada iyo hirgelinta barnaamijyo awood dhisid ah;
c) dajinta siyaasadda iyo heerarka habsami ee qandaraas bixinta qaranka, xaraashka alaabadda ama gaadiidka laga maarmo;
d) samaynta iyo soo saarida heerka habsami ee laga rabo waraaqaha qandaraas bixinta qaranka;
e) Illaalinta iyo hubinta Qandaaaska Qaranka iyo in la xaqiijiyo u hogaansanaanta waajibaadyada sharci ee jira.
f) Diyaarinta warbixin sanadeedka dhammaan shaqooyinka qandaraas bixinta Qaranka, taas oo ay u soo gudbin doonaan Madaxweynaha JSL si uu u hordhigo Golaha Wakiiladda.
g) Qabashada kulan guud oo sanad leh ah oo ay ka soo qayb-galayaan dawladdu, iyada oo lays kugu keenayo dawlada, ganacsatada, iyo hay'adaha horumarka inagala shaqeeya si loogu darso horumarka arrimaha la xidhiidha qandaraas bixinta Qaranka.
h) Inay daabacaan saddexdii biloodba mar warbixin ku saabsan qandaraasyada Qaranka.
i) Kala talinta xukuumadda arrimaha la xidhiidha qandaraasyada.
j) Baadhista iyo ka mabnuucista qandaraasyada qaranka tartamayaasha iyo shirkadaha/qandaraaslayaasha ku kacay khiyaano iyo musuqmaasuq si waafaqsan qodobada Xeerkan.
k) Keydinta iyo gacan ku haynta liiska ganacsatada, qandaraaslayaasha, la taliyayaasha iyo

tartamayaasha suurto galka ah kuwaas oo laga saaray xuquuqda ka qayb qaadashada qandaraasyada qaranka.

2) Gudida Qandaraasyadu waxay:-

a) Dib u-eegi doontaa qorshayaasha qandaraaska si ay u hubiso inay taageereen hadafyada iyo hawl-galada Hay'ada Qandaraaska isla leh una hogaansameen nidaamka miisaaniyadda dawladda.

b) dabagali doonaan saddexdii biloodba mar hirgelinta qorshaha qandaraaska kana qaadi doonaan talaabo ku habboon xaaladaha xilgudashadu liidato amase aanay ku filnayn.

c) Dib u-eegi doonaan Shaxda iyo cayimaadaha qandaraaska, hubiyaana in habraaca qandaraas bixinta la raacay ay si adag u waafaqsanyihiin qodobada Xeerkan, Wareegtooyinkiisa shaqaynaya iyo hagayaashiisa.

d) Gudida Qandaraasku waxay adeegsan karaan la-taliyayaal farsammo oo leh khibrado gaar ah oo loo baahdo si ay si hufan oo hagaagsan u gutaan hawlahooda.

e) dib u-eegi doonaan warbixinta qiimaynta naadada iyo dalabka qorsheed (proposal) iyo warbixinta, bixinta heshiiska ee la soo jeediyay waxana ay ansixin doonaan ama si kalaba u awood siin doonaan hay'adda qandaraaska iska leh inay sii wado habraaca qandaraaska.

f) waxa ay go'aaminayaan ansixinta ama diidmada tartamayaasha;

g) dib u-eegayaan dhammaan heshiisyada la soo jeediyay;

h) dib u eegaan ansixiyaana warbixin sanadeedka qandaraas bixinta ee ay diyaarisay Faraca Qandaraas bixintu;

i) ansixiyaan codsiyada waxka bedelka heshiiska xaaladahan soo socda:

    i. haddii heshiiska asalka ah ay shardi u tahay in Guddida Qandaraasku ay ansixiyaan;

ii. haddii waxka bedelka heshiisku uu gaadhayo qiimaha xadka awooda Gudida Qandaraasyada Qaranku.

## Qodobka 18aad
## Xubinimada iyo Magacaabida Guddida

1) Xubnaha gudidu waxay ka koobnaan doonaan gudoomiye, gudoomiye ku-xigeen iyo 7 (todoba) xubnood oo kale.
2) Xubnaha gudida ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waxa magacaabaya isla markaana xilka ka qaadi karra Madaxwaynaha.
3) Magacaabida xubnaha Guddidu waxa cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiiladda ee JSL.

## Qodobka 19aad
## Muddo Xileedka Guddida

1) Muddada xilka ee xubnaha Guddida Qandaraasyada qaranku waxay noqonaysaa shan (5) sano oo ka bilaabanta maalinta xilka ay Maxkamadda Sare u dhaariso.
2) Xubnaha gudida waxa xilka loo magacabi karaa hal muddo xileed oo danbe.

## Qodobka 20aad
## Xilka Qaadista Xubnaha Gudida

1) Madaxwaynuhu wuxuu kaga qaadi karaa xubinaha Gudida mid ka mid ah sababahan soo socda:-
   a) Haddii uu xilka u gudan waayo karti darro fadhiid ka dhigta hawsha guddida;
   b) Haddii uu ku kaco hawlo la xidhiidha musuq-maasuq, xatooyo, eex iyo qaraabo kiil laguna cadeeyo.
   c) Haddii uu is-casilaad u gudbiyo Madaxweynaha, lagana aqbalo.
   d) Haddii uu ku kaco danbi xadhigiisu gaadhsiisan yahay 3 sanno ama ka badan.
   e) Haddii uu gudan kari waayo xilkiisa sababo caafimaad darro oo la xidhiidha xanuun jidh ahaaneed ama maskaxeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ahi.

f) Haddii uu ka maqnaado shan (5) kulan oo isku xiga shirarka Guddida isaga/iyada oo aan haysan cudur daar macquul ah.

## Qodobka 21aad
## Banaanaanshaha Xubinta Guddida

1) Xaaladaha ay bannaanaato xubin ka tirsan xubnaha Guddidu, si waafaqsan Qodobka sare, waxa buuxinteeda loo raacayaa si la mid ah sidii lagu soo magacaabay.
2) Xubinta loo magacaabay jagada bannaanaatay, waxa ay xilka hayn doontaa mudada u dhiman muddo xileedka guddida.

## Qodobka 22aad
## Shirarka Guddida

1) Shirarka Guddidu waxa ay noqon doonaan kuwo joogto ah iyo kuwo aan joogto ahayn.
2) Shirarka joogtadda ah ee Guddidu waxa ay Guddidu qabanayaan bishii hal mar ugu yaraan.
3) Xaaladaha ay loo baahdo Guddidu waxa ay qaban kartaa shirar aan joogto ahayn, marka Guddoomiyaha ama ugu yaraan saddex xubnood oo Guddida ka mid ahi ay sidaa codsadaan.
4) Shirarka Guddidu waxa ay ku qabsoomayaan marka ay soo xaadiraan ugu yaraan affar shan xubnood oo Guddida ka mid ahi.
5) Shirarka Guddida waxa guddoomin doona Guddoomiyaha Guddida, xaaladaha uu maqan yahayna Guddoomiye ku-xigeenka Guddida.
6) Go'aanadda Guddidu waxa ay ku ansixi doonaan aqlabiyada xubnaha shirka fadhiya.
7) Shirarka Guddida waxa xoghayn u noqon doona, Agaasimaha Guud ee Guddida, balse ma laha wax cod ah, lagumana tirin doono xubin ahaan marka la go'aaminayo kooramka.
8) Marka laga reebo xaaladaha si cad loo sheego, Gudidu waxay go'aamin doontaa habraaca nidaamka kulanadooda.

## Qodobka 23aad
## Hawlaha Maamulka Guddida

1) Gudidu waxay yeelan doontaa Agaasime Guud oo uu soo magacaabo Madaxweynuhu, kaas oo ahaan doona xoghayn aan Guddida ka tirsanayn;
2) Agaasimaha Guud ee lagu sheegay farqadda 1aad ee Qodobkani, waxa uu Guddida ka caawin doonaa arrimaha maamulka, oo ay ka mid yihiin in uu xoghaye u noqdo kulanadda Guddida.
3) Agaasimaha Guud waxa uu ka masuul yahay: -

a) Fulinta hawl- maalmeedka xafiisyada Guddida iyo maamulka shaqaalaha Guddida,
b) fulinta go'aanada Guddida,
c) Illaalinta diwaanada saxda ah ee nidaamada iyo go'aanada Gudida iyo shaqooyinka kale ee ay hadba Guddidu uga baahato.

## Qodobka 24aad
## Qaab-dhismeedka Guddida

1) Guddidu waxay yeelanaysaa qaab-dhismeed ka kooban Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen, Xubnaha Guddida, Agaasime Guud, waaxo, qaybo, iyo faracyo kuwaas oo lagama maarmaan u ah hawl gudashadooda.
2) Qaab-dhismeedka Guddida ee ku xusan farqada sare ee Qodobkan waxa ku jiri doona, ugu yaraan waaxahan soo socda: -

a) Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda.
b) Waaxda Kormeerka iyo dabagalka.
c) Waaxda Siyaasadda, sharciga iyo cilmi baadhista; iyo
d) Waaxda Tababaradda iyo awood-dhisida.

3) Waaxyaha, qaybaha iyo faracyadda Guddidu waxa ay hoos iman doonaan Agaasimaha Guud ee Guddida.

## Qodobka 25aad
## Miisaaniyadda Guddida

1. Maaliyadda Guddida Qandaraasyaddu shaqadooda ku fulin doonaan waxa ay ka iman doonaan:-

a) Qadarka looga qoondeeyo miisaaniyadda qaranka;

b) Amaahda, deynta ama deeqaha ay heleen Guddidu.
c) Fiiga ama ajuurooyinka ay ka helaan qoraaladda qandaas bixinta;
d) Dhaqaalaha uga soo hoyda iibka iyo daabacaadda ay sameeyeen Guddidu.
e) deeqaha la siiyo Guddida balse aanay ku jirin deeqaha, hadyadaha ka yimaada qandaraaslayaasha, ganacsatada iyo la-taliyayaashooda.
f) Ilaha kale ee dakhli ee ay ansixiyaan Sharci dajintu.

2. Ku soo rogida ajuurooyinka iyo khidmada sida ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan, xarfaha (c) iyo (d) Guddidu waxa ay hubin doonaan:-

a) Ujuurooyinka iyo khidmaduhu waxa ay ahaan doonaan wax yar si aanay uga reebin shakhsiyaadka awood u lahaanshaha adeegyada Maamulka iyo samaynta cabashooyinka iyo rafcaanada.
b) Iibinta daabacaaduhuna waxa kaliya oo ay ahaan doonaan cawad-celin kharashka soo saarida daabacaadaha.

## Qodobka 26aad
## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1) Guddidu waxay diyaarinayaan sanad maaliyadeedyada waxaanu hayn doonaa buugaagta muhiimka ah ee xisaabaadka iyo diwaanada oo leh qaabka lagu xusay xeerka maamulaya maamulka iyo diwaanada dawladda wakhtiga ay dhaqangalaan.

2) Buugaagta iyo xisaabaadyada Guddidu waxaa baadhis ku samayndoona sanad walba ama waqtiyadda kale ee loo baahdo Hantidhawraha-Guud ee Qaranka ama hantidhawre uu soo magacaabay ama awood uu soo siiyay Hantidhawraha-Guud.

**Qodobka 27aad**
**Sanad Maaliyadeedka**

Sanad maaliyadeedka Guddidu wuxuu la mid ahaan doonaa sanad maaliyadeedka Dawladda.

**Qodobka 28aad**
**Warbixin Sanadeedka**

1) Guddidu ugu danbayn saddex bilood ka dib dhamaadka sanadka, waxa ay warbixin daabacan u gudbin doonaan Madaxweynaha, warbixinta waxa ku jiri doona: -

a) Waxqabadka Guddida iyo wixii u qabsoomay sanadkii hore.
b) Nuqul xisaabaadka baadhista hanti-dhawrka lagu sameeyey.
c) Soo jeedimo ku saabsan hagaajinta meelo gaar ah oo alaabo ah, dhisme, adeegyada iyo badalaadda iyo barnaamijyada u qorshaysan ee hirgelinta soo jeedimaha.

2) Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyaddu wuxuu u soo gudbin doonaa warbixin sanadle ah Madaxweynaha iyo Golaha Wakiiladda, Guddi hoosaadka Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qarankasi ay ugu sameeyaan baadhis una soo hordhigaan Gole weynaha.

3) Guddi hoosaadka Golaha Wakiiladda ee Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxa ay xaq u leeyihiin in ay u yeedhaan su'aalana waydiiyaan Guddida Qandaraasyadda Qaranka.

## QAYBTA 3AAD
## GUDDIDA QIIMAYNTA CODSIYADDA IYO NAADOOYINKA

**Qodobka 29aad**
**Guddida Qiimaynta Codsiyadda iyo Naadooyinka**

1) Guddida Qiimaynta Naadooyinka iyo Codsiyaddu waxa ay ka koobnaan doonaan shan xubnood oo kala ah: -

a) Laba xubnood oo ka socda hay'adda mashruuca qandaraaska iska leh oo uu soo magacaabo Wasiirku ama Guddoomiyaha Hay'adda, oo aqoon/khibrad u

leh qandaraasyadda guud ahaan ama gaar ahaan qandaraaska laga hadlayo, iyo saddex xubnood oo ka socda Guddida Qandaraasyadda Qaranka, oo uu soo magacaabo Guddoomiyaha Guddida Qandaraasyadda Qaranku.

b) Xubnaha ka socda Wasaaradda/hay'adda mashruuca qandaraaska iska leh waxa uu xilkoodu noqdo in ay hubiyaan qeexidda farsammo ee shayga ay doonayaan, halka xubnaha Guddida Qandaraasyadda Qaranka ay awood u leeyihin kala saarida cida ku tartamaysa qandaaska ee soo xaraysatay codsigooda.

c) Guddooyaha Guddida Qandaraasyadda Qaranku markuu helo codsiga hay'adda ay khuseyso iyo magacyadda xubnaha matalaya waxa uu soo magacaabayaa xubnaha Guddida.

d) Guddidu waxa ay xaaladaha loo baahdo adeegsan kartaa la-taliyayaal farsamo.

e) Guddida fadhiyadoodu waxa ay noqon doonaan muddada ay shaqeyanayaan xarrunta Guddida Qandaraasyadda Qaranka waxana xoghayn u noqondoona xubin uu magacaabo Guddoomiyuha Hay'adda Qandaasyadda Qaranku.

## Qodobka 30aad
## Shaqooyinka Guddida Qiimaynta

1) Shaqooyinka iyo hawlaha Guddida Qiimaynta Codsiyada waxa ay noqonayaan sidan soo socota: -

a) Diyaarinta, daabacaada iyo qaybinta yeedhmooyinka (invitations) naadada iyo waraaqaha naadada.

b) Qabashada iyo illaalinta codsiyadda qandaraasyadda.

c) Furida codsiyadda naadada iyada oo la raacayo qodobada Xeerkan.

d) Qiimaynta naadada iyaga oo adeegsanaya farsammo yaqaano iyo la-taliyayaal si ay si hufan u qiimeeyaan naadooyinka iyo qorshayaasha kale iyo samaynta soo jeedimaha bixinta heshiiska.

e) Diyaarinta kulanadooda iyo qiimaynta guud ee codsiyada qandaasyadda.

### Qodobka 31aad
### Faracyada Qandaraasyada

1) Hay'ad kasta oo dawladeed waxa ay yeelanaysaa faraca Qandaraaska sida ku xusan Xeerkan.
2) Wasiirka/Guddoomiyaha hay'ad kasta oo dawladeed waa inuu go'aamiyo inta ay ka koobnaan doonaan tirada shaqaalaha ee faraca qandaraasyadu, kuwaas oo loo tababaray aqoona u leh qandaraaska.
3) Faraca Qandaraasku wuxuu u hawlgeli doonaan iyadoo ay korka ka illaalinayaan Gudida Qandaraasyadu.
4) Shaqooyinkqa Faraca Qandaraasyada waxaa ku jiraya: -
   a) Diyaarinta iyo isku duba ridka Qorshaynta Qandaraaska ee hay'ada ee sanadlaha ah.
   b) Waxay u qaabilsanaan doonaan hay'adda wada-shaqaynta Guddida Qandaraasyadda Qaranka.

## QAYBTA 4AAD
## HABDHAQANKA QANDARAAS BIXINTA

### Qodobka 32aad
### Madax Banaanaanida Shaqooyinka iyo Awoodaha

Iyada oo la raacayo qodobada Xeerkan Gudida Qandaraasyada Qaranku waxa ay u shaqayn doonaan si madax banaan marka ay shaqadooda gudanayaan si waafaqsan qodobada Xeerkan waxaanay ka masuul ahaan doonaan bixinta qandaasyadda qaranka iyo dabagalka fulinta heshiisyada lala galo qandaraaslayaasha.

### Qodobka 33aad
### Kala Duwanaanshaha U Dhaxeeya Xubnaha Guddida Qiimaynta

1) Kala duwanaashaha u dhexeeya xubnaha Guddida Qiimeynta **waxay ku kala baxayaan *cod hal dheeri ah.***
2) Guddoomiyaha Guddidu waxa uu u saari doonaa saddex xubnood oo guddi ah si ay u dhex-dhexaadiyaan dhinacyadda Guddida Qiimaynta.

## Qodobka 34aad
## Dhawrsanaanta Waraaqaha

1) Qof kasta oo ku lug yeesha hawlaha qandaraas bixintu waa inuu tixgeliyaa una macaamillaa hab dhawrsoon dhammaan waraaqaha iyo warbixinaha la xidhiidha shaqooyinka Guddida Qandaraasyada Qaranka.
2) Qofna isaga oo haya ama gacanta ay ugu jirto qoraal ama xog kasta oo la xidhiidha macaamil ama wax is dhaafsi ay bixisay Guddida Qandaraasyaddu lama wadaagi karo ama iskuma dayi karo in uu la wadaago xog kasta oo ku jirta qoraalkaasi ama uma gudbin karo qoraal kaasi qof aan ka ahayn masuuliyiinta Guddida Qandaraasyadda Qaranka.

## Qodobka 35aad
## Heerarka Habsami ee Cadaalada

1) Marka ay gudanayaan waajibaadkooda, Guddida Qandaraasyada Qaranku waxay qaadan doonaan heerka habsami ugu sareeya ee cadaaladda, iyagoo maanka ku haya:

a) U sinaanta dhammaan fursadaha ganacsatada suurto galka ah, qandaraaslayaasha iyo la taliyayaasha;
b) cadaalada ku dhaqida dhammaan dhinacyada; iyo

2) Baahida loo qabo in la helo qiimaha ugu fiican ee lacagta marka laga hadlayo qiimaha (waxa ay gooynayso), tayada iyo keenida iyada oo dhug loo yeeshay cayimaada la ururiyay iyo qiimaynta loo dajiyay habraacaasi.

## Qodobka 36aad
## Wakhtiga La Galayo Heshiisyada

Marka laga reebo xaalada gurmadka deg-dega ah iyo haddii marka horeba laga ansixiyo Gudida Qandaraasyada, Hay'adda Qandaraaska iska lihi lama gali karto heshiis qandaraas illaa iyo ugu yaraan afar iyo tobanka (14) maalmood ay dhamaadaan oo ka billaabmaysa ogaysiinta bixinta heshiiska tartamaha ku guulaystay iyada oo la raacayo Qodobka 68aad(4).

## QAYBYA 5AAD
## QODOBADA GUUD EE HABRAACA QANDARAAS BIXINTA

### Qodobka 37aad
### Shuruudaha Tartamayaasha

1) Iibiyayaasha, qandaraaslayaasha ama la taliyayaasha waxaa loo ogolaanayaa inay ka qaybqaataan nidaamada qandaraaska iyaga oo aan wax xanibaad ah ama takoor ah aan lagu samayn, marka laga reebo xaaladaha uu tartamuhu aanu u qalmin sida ku xusan Qodobka 6aad ama laga saaray (mamnuucay) sida ku xusan Qodobka 53aad.

2) Si loo siiyo heshiiska, ama, haddii nidaamyada kala saarida ee hore la qabto, si looga qayb qaato fadhiyada qanradaas bixinta, tartamuhu waa inuu buuxiyaa kulankaasi qiimaynta ay dajiyeen Guddida Qandaraasyadu. Qiimayn taasi waxaa ku jiri kara: -

a) Shuruudo farsammo iyo kuwo khibradeed oo la xidhiidha awooda, khibrada, khayraadka maaliyadda, qalabka iyo adeega si ay u bixiso waxii la qandaraasay;
b) Awooda sharciyeed ee lagu galayo heshiiska qandaraaska;
c) Tartamuhu waa in uu ahaado mid aan musalaf ahayn, qofka sharcigu u xilsaaray maamulida arrimaha qof musalifayna ahayn, aanu kicin ama aanu ku jirin habraacii lagu laalaabi lahaa (kala diri lahaa) isla markaana aysan dacwad sharci ahi ku socon oo la xidhiidh leh arrimaha aynu xaga sare ku xusnay;
d) Haddii aanay Guddida Qandaraasyadda Qaranku ka reebin in ay la tartamaha sida ku xusan Qodobka 6aad ama 7aad ee Xeerkan.

1) Shardi kasta oo la sameeyay iyada oo la raacayo qodobkan waxa lagu dajin doonaa waraaqaha qiimaynta hore, haddii ay jiraan iyo waraaqaha naadinta, waxaana si

isku mid ah loogu dhaqi doonaa dhammaan tartamayaasha iyadoon la kala saarayn (faquuqayn). Kaliya qiimeynta lagu sheegay waraaqahaasi ayaa lagu dabaqi doonaa.

2) Shirkadaha dawladdu leedahay waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan nidaamada qandaraaska kaliyaata haddii ay u abuuran yihiin in ay sharci ahaan iyo maaliyad ahaan ay xor yihiin, kuna hawlgalaan sida ku xusan xeerka ganacsiga oo aanay ahayn Hay'ado ku tiirsan ama xidhiidh la leh hay'addaha Dawladda, waxaanay u hogaansami doonaan shuruudaha naadinta ee la midka ah tartamayaasha kale.

**Qodobka 38aad**

**Ka Reebida Ku Timaada Warbixinta aan Saxda Ahayn**

Guddida Qandaraasku waxay ka reebi kartaa tartamaha haddii ay ku hesho waqti uun in warbixinta uu soo gudbiyay ee khusaysa shuruudaha in uu buuxiyo ay tahay ee tartamuhu in ay nuxur ahaan aysan sax ahayn ama ay nuxur ahaan dhamays tirnayn.

**Qodobka 39aad**

**Kala Saarida Hore**

1) Nidaamada kala saarida hore waxaa la isticmaali doonaa ka hor yeedhmada naadimaha iyada oo ay aragtidu tahay in la go'aamiyo qaybiyayaasha iyo qandaraaslayaasha buuxiyay xaaladahan soo socda ee qandaraasida:-

(a) Dhismayaasha balaadhan ee kakan kaasi oo kharashka diyaarinta naadintu uu sareeyo;
(b) Qiimaha sare ama heshiisyada kakan ama kooxaha alaabo ah ee xidhay xidhmo ahaan si ay u noqdaan heshiis balaadhan.

2) Dalabka qiimaynta hore waxaa lagu daabici doonaa ugu yaraan wargayska si aad ah loo akhristo haddii ay suurtogal tahayna Faafinta Dawladda iyo joornaalka Qandaraaska ama mareegta (barta) internetka, haddii ay

tahay Tartan Naadayn Caalami ahna, sidoo kale warbaahinta caalamiga ah ee la doortay iyadoo la raacayo hagitaanka Guddida. Guddoomiyaha Guddidu wuxuu Wareegto ahaan sheegi karaa joornaalada dalka kasoo baxa ee yeedhmada qiimaynta hore lagu xayaysiin karo waxaanu bixin karaa tilmaan bixino dheeraad ah oo ku saabsan ogaysiisyada qandaraaska.

3) Marka nidaamyada qiimaynta hore la sameeyo, Guddida Qandaraasku waxay siin doontaa waraaqaha qiimaynta hore dhammaan tartamayaasha ka soo jawaab celiyay dalabka qiimaynta hore. Waraaqaha dalabka hore waxa ay siin doonaan tartamayaasha warbixinta looga baahanyahay si ay u diyaariyaan una soo gudbiyaan codsiyada qiimaynta hore.

4) Tartamayaasha waxaa loo ogolyahay wakhti ku filan oo ay ku iibsadaan, ku diyaarshaan, kuna gudbiyaan waraaqaha qiimaynta hore. Muddada sidan loo ogolyahay waa inaanay ka yaraan muddada loo ogolyahay naadiyayaashu inay gudbiyaan naadinta ku xusan Naadinta Tartanka Dawladda iyo Naadaynta Tartanka Caalamiga ah sida ay u kala horeeyaan.

5) Marka nidaamada qiimaynta hore la sameeyo, Guddida Qandaraasku waxay si habboon u samayn doontaa codsade kastaa natiijooyinka qiimaynta ee buuxinta qiimaynta hore.

6) Dhammaan codsadayaasha kuwaasi oo buuxiya shuruuda ugu yar ee qiimaynta hore waxaa loogu yeedhi doona inay naado sameeyaan.

7) Haddii aan nidaamada qiimaynta hore aan la fulin, qiimayn danbe, taasi oo Guddida Qandaraasku xaqiijiso buuxinta shuruudaha tartamaha si loo siiyo oo waafaqsan qiimaynta ku xusan waraaqaha naadinta, ayaa la adeegsan doonaa.

8) Waraaqaha shuruudaha hore ee shaqada waxaa lagu iibin karaa si dib loogu soo celiyo kharashaadka laakin qiimaha waa la xisaabin doona si ay u daboosho kaliyaata kharashaadkaas la xidhiidha daabacaada, sawiraada iyo qaybinta laguna darimaayo xadi faa'iido ahna.

9) Qiimaha waraaqaha dalabka lagu samaynayo waxaa lagu go'aansan doonaa sida ku xusan wareegtooyinka.

## Qodobka 40aad
## Cadaynta iyo Wax-ka-bedelka Waraaqaha Naadinta iyo Qiimaynta Hore

1) Guddida Qandaraasyaddu waxay inta lagu gudo jiro laba cisho oo maalmaha shaqada ah ka jawaabi doontaa codsi kasta oo tartamuhu soo jeediyo oo ku saabsan cadaynta waraaqaha naadaynta, ama waraaqaha qiimaynta hore, iyada oo ay shardi tahay in codsigaasi oo kale loo gudbiyo Guddida Qandaraaska inta lagu gudo jiro wakhtiga lagu cayimay waraaqaha qandaraaska ama qiimaynta hore.

2) Jawaabaha codsiga cadaynta, iyo sidoo kale waxka badal kasta iyo cadayn kasta oo kale oo ah waraaqo naadineed ama qiimayn hore waxaa lala socodsiin doonaa dhammaan tartamayaasha ka qayb qaadanaya nidaamada qandaraaska iyada oon dib loo dhigayn, si loogu ogolaado tartamayaasha in ay helaan fursad lagu qaadayo cadaymahan ama wax ka badalkan oo lagu xisaabtamo marka ay diyaarinayaan waxa ay soo gudbinayaan.

3) Guddida Qandaraasku waxay, haddii ay lagama maarmaan tahay u ogolaan kartaa cadaymo iyo wax ka bedelo si loogu xisaabtamo, waxa ay balaadhin doontaa wakhtiga ugu danbeeya ee gudbinta naadada ama codsiyada si qiimayn hore loo sameeyo.

## Qodobka 41aad
## Sifada Alaabaha/Badeecada, Dhismayaasha iyo Adeegyada

1) Illaa xadka macquulka ah, cayimaadda, qorshaha, sawiradda, naqshadda iyo shuruudaha ama sifo kasta oo badeecadeed, dhisme ama adeeg waxaa lagu salayn doonaa:

a) Shayga la xidhiidha sifada farsammo ahaan iyo calaamadaha tayo, iyo
b) Fulinta alaabada, dhismaha ama adeegyada kale ee la qandaraaso; laakin ma jiri doonaan wax shuruud ah oo looga baahanyahay ama tixraac u ah calaamad gaar ah, calaamad gaar ah oo ganacsi (trade mark), xuquuq magaceed(patent), magaca, nashqada, nooca, asalnimo gaar ah ama soo saare haddii aysan jirin dariiq kale oo ku filan sharixida sifada alaabaha, dhismayaasha ama adeega la qandaraasayo iyada oo ay shardi tahay erayadaasi ”ama wax u dhigma” in lagu daro.

2) Sifo kasta oo ku saabsan farsamada ama calaamadaha tayo ee badeecada, dhismayaasha ama adeegyada la qandaraasayo iyo shuruudaha sida tijaabinta, bacaynta, calaamadaynta, astaamaynta, ama xaqiijinta waafaqsanaanta, ama calaamadaha iyo eray bixinta, kuwaasi oo khuseeya fulinta alaabada ama abuura carqalado aan la cadayn ka qaybqaadashada tartamayaasha khibrada u leh, oo si aan daruuri ahayn oo aan loo cudur daari karin u xadida tartanka, lagu darimaayo ama lagu isticmaalimaayo naadada dhexdeeda iyo waraaqaha hore ee qiimaynta.

3) Hay’adda mashruuca qandaraaska iska lihi waxay diyaarin doontaa sifooyinka shuruudaha qandaraaska oo waafaqsan Qodobka 7aad iyo sidoo kale sharci kasta oo illaalinta deegaanka ah oo dhaqan gal ah iyo sidoo kale cahdiyada caalamiga ah iyo heerarka habsami.

## Qodobka 42aad
## Wakhtiga ugu danbeeya ee Lasoo Gudbinayo Naadooyinka iyo Codsiyada kale.

Guddida Qandaraasyadu waxay dajin doontaa wakthiga ugu danbeeya ee la soo gudbinayo naadada, codsiyada ku saabsan qiimaynta hore iyo dalabyada danaynta ah (expression of interest) si loo ogolaado wakhti ku filan diyaarintooda iyo gudbintooda, iyada oo ay aragtidu tahay in la badiyo tartanka, iyadoo la raacayo muddada ugu yar ee lagu dajiyay Xeerkan iyo Wareegtooyinka.

## Qodobka 43aad
## Tirtirida Nidaamada ama Diidida Naadooyinka

1) Guddida Qandaraasyadu waxay:
   a) Diidi kartaa dhammaan naadooyinka wakhti kasta oo ka horeeya ogolaanshaha/aqbalida naado;
   b) Tirtiri kartaa nidaamada qandaraaska haddii:
      i. Baahidii qandaraasku aanay jirin ama ay si weyn isku badashay;
      ii. Aanay jirin maalgelin ku filan oo loo heli karo qandaraaska;
      iii. Ay jirto isbadal mug leh oo ku jira faah-faahinta farsammo ee la rabo, shuruudaha naadinta, shuruudaha heshiiska ama faah-faahinta kale, sida in dib u billaabida nadaamku ay tahay mid lagama maarmaan ah;
      iv. Aanay jirin cid ka soo jawaab celisay naadada oo codsigeeda la qabtay.
      v. ay jiraan cadayn ku saabsan musuq-maasuq, khiyaamo, khasab ama mu'aamarad ay sameeyeen tartamayaashu; ama
      vi. in la tirtiro ay muhim u tahay amaanka dalka.

2) Ka hor diidida dhammaan naadooyinka ama tirtirida nidaam kasta oo qandaraas, Guddida Qiimaynta waa inuu diyaariyo codsi qoraala oo ku saabsan ansixinta diidmada ama tirtirida. Codsiga waxaa loo gudbin doonaa Gudida Qandaraaska waxaanay si cad u sheegi doontaa:-

a) Sababo faah-faahsan oo ku saabsan soo jeedinta diidmada iyo tirtirida;
b) Aqoonsiga nidaamada qandaraaska, oo ay ku jiraan gaar ahaan, in naadooyinka mar hore la furay iyo in kale; iyo
c) Haddii nidaam qandaraas oo cusub la soo jeediyay, haddii ay jirtana, wax-ka-bedelada la soo jeediyay.

3) Sababta loo diidayo naadooyinka oo dhan, loona tirtirayo nidaamada qandaraas bixinta, waxaa lagu qori doonaa diwaanka nidaamada qandaraas bixinta, waxaana si dhamaystiran loo gaadhsiin doonaa tartamayaasha.

4) Guddida Qandaraasyada wax masuuliyad ahi kama saarna tartamaha, haddii ay tirtirto wadida naadada gabi ahaanba sida ku cad farqadda 1aad ee Qodobkan.

5) Haddii go'aanka lagu tirtirayo nidaamada qandaraaska la qaato ka hor wakhtiga kama danbaysta ahaa ee gudbinta naadooyinka, naado kasta oo la helay waxaa lagu celin doonaa iyadoo la furin tartamaha.

6) Xaalada tirtirida ama diidida dhammaan naadooyinka marka loo eego farqadda 1aad ee Qodobkan, qandaraasida dib looguma naadayn karo isaga oo leh cayimaado la mid ah iyo heshiis haddii aan tirtirida hore la xidhiidhin arin ku saabsan miisaaniyadda ama sabab kale oo aan la xidhiidhin cayimaada iyo shuruudaha heshiiska.

7) Haddii qandaraas bixinta la soo celinayo, sababta tirtirida habkii hore waa in la baadhaa waana in shuruudaha heshiiska iyo cayimaada farsamaba si ku haboon wax looga badalaa.

## Qodobka 44aad

## Ogaysiiska Dadweynaha ee Bixinta Heshiisyada

Guddida Qandaraasyadu waxay si habboon ugu daabici doontaa jaraa'id si fiican dadka u gaadha, haddii ay suurto gal noqotana Joornaalka Qandaraaska, Ciwaanka barta internetka ama Faafinta Rasmiga ah, ogaysiiska bixinta heshiiska taas oo qiimaha heshiisku uu ka bato bilawga lagu xusay Qodobka 98aad ee wareegtooyinka, kaas oo tilamaamaya qiimaha heshiiska iyo magaca iyo cinwaanka tartamaha ku guulaystay.

## Qodobka 45aad
## U Xogwaramida Tartamayaasha aan Guulaysan.

Guddida Qandaraasyadu waxay haddii ay ka codsadaan tartamayaasha aan guulaysan, ku wargelinaysaa tartamaha aan guulaysan sababta aanu u guulaysan.

## Qodobka 46aad
## Qaabka Isgaadhsiinta

1) Marka laga reebo, haddii aanu Xeerkani si kale dhigayn, dukmantiyada (qoraalada), ogaysiisyada, go'aanada iyo isgaadhsiimaha kale ee ku xusan Xeerkan ee uu u soo soo gudbiyay Guddida Qandaraasyadu tartamaha ama tartamayaasha waa inay qoraal ahaadaan.

2) Guddidu waxay u ogolaan karaan isticmaalka qaabab kale oo isgaadhsiineed, oo ay ku jiraan isgaadhsiinta elektaroonikada ah ee ku saabsan daabicida dalabka naadada, gudbinta waraaqaha naadada, gudibinta naadooyinka, gebogebaynta heshiisyada, iyo lacag bixinaha iyada oo ay shardi u tahay in siyaabahan kale ee isgaadhsiineed ay waafaqaan: -

a) In uu awood u leeyahay inuu hayo nuxurka fariinta.
b) In uu bixinayo heer ku filan oo amaan.
c) Aanu si aan habboonayn u xanibin tartamayaasha awooda u leh nidaamka naadada.
d) Buuxiyo shuruudaha kale ee ku xusan Xeerkan iyo Wareegtooyinka, iyo shuruucda kale ee ku dabaqma.

## Qodobka 47aad
## Qorshaynta Qandaraaska

1) Dhammaan hay'adaha dawladu waa inay fuliyaan qorshe sanadeed qandaraas, iyada oo ay ujeedadu tahay in la gaadho qiimaha ugu badan ee kharashaadka dawladdu goyn karaan iyo ujeedooyinka kale ee Xeerkan. Qorshuhu waa inuu waafaqsan yahay barnaamijka la ansixiyay ee miisaaniyadiisa ugu jira.

2) Gudida Qandaraasidu waa inay ansixiso Qorshaha Qandaraaska si kaltanana dabagal ugu samayso hirgelinteeda.
3) Qorshaha Qandaraasida waxaa loo diyaarin doonaa sanad ahaan ku salaysan sanad maaliyadeedka Dawladda waxaanay xisaabta ku darsan doonaan miisaaniyad sanadeedka Dawladda. Marka ugu horeysa, qorshaha qandaraasidu wuxuu xisaabta ku darsan doonaa kuna dari doonaa heshiisyada tagay in la fuliyay sanad maaliyadeedkii hore. Qorshaha Qandaraasku wuxuu ina tusi doonaa: -

a) Heshiiisyada oo urursan (bushqadaysan).
b) Kharashka la odorosay ee bushqad kasta oo heshiis.
c) Habka qandaraasida la soo jeediyay ee bushqad kasta oo heshiis kasta.
d) Jaranjarada shaqada iyo waqtiga oo xadidan.

3) Hay'adaha dawladu ma qayb-qaybin karaan qandaraaska ama hoos uma dhigi karaan qiimaha si ay uga dheeraato in la baahiyo qandaraaska sida uu Xeerkani waajibiyay.
4) Faraca Qandaraaska ee hay'ad kastaa wuxuu saddex billoodiiba, dib u'eegi doonaa cusboonaysiina karaa qorshahooda qandaraas waxaanu ogaysiin doonaa waxka bedelka kasta Wasiirka ama Guddoomiyaha hay'adda.

## Qodobka 48aad
## Habraaca Qandaraaska ee Hore loo sii Qadimay

Xaaladaha haddii lacagta maagalinta ah aan la bixin sanad maaliyadeed khaas ah laakin la filayo in la siiyo mustaqbalka la filayo, Guddida Qandaraasku waxay sii wadi doontaa qandaraas hordhac ah si ay u hubiso waqtiga bixinta iyo dhamaystirka heshiiska, laakiin xaaladan oo kale:

a) Wax Heshiis ah lama saxeexi doono illaa iyo Sarkaalka Masuulka ahi xaqiijiyo helitaanka lacagaha si ay buuxiyaan waajibaadka ka dhalanaya heshiiska soo baxay;
b) Naadada iyo waraaqaha la soo jeediyayna waxay si cad u sheegi doonaan in qandaraasku yahay mid aan la

hubin uuna ku xidhanyahay helitaanka lacagaha/maalgalinta.

## Qodobka 49aad
## Dajinta Qiimaha

1) Dajinta qiimaha lama ogola illaa iyo lagu xuso heshiiska qandaraaska si ay xisaabta ugu darsato isbedelka xaaladaha dhaqaale ee heshiisyada ka badan muddo lagu ciyimo Wareegtooyinka.

2) Haddii heshiiska qandaraasku uu dajiyo qiimaha, waxa lagu cayimi doonaa:-

a) Shuruudaha, sida yaraynta iyo kordhinta arrimaha kharashka, shaqaalaha, gaadiidka iyo tamarta, kuwaas oo dajinta qiimaha la ogolaan doono.

b) Qaaciidooyinka, iyo tusmada la tixraacayo si ay u go'aamiso in shuruudaha dhaqaalaha loo badalo xadi ku filan oo muhiim ah si ay u cadayso dajinta qiimaha una qeexo xadiga la kordhinayo iyo ka la yaraynayo.

c) Xadiga isbabadal ee qiime dajinta lagu hirgalin doono.

d) Habraaca la raaci karo.

3) Heshiiska qandaraaska waxaa lagu dari karaa in, marka codsiga qaaciidada dajinta qiimaha ay u hogaamiso waxkabedel qiime oo ka badan boqolkiiba inta cayiman ee qiimaha bilawga ah ama boqolkiiba inta cayiman ee isku dheeli tirka heshiiska, Haay'ada Qandaraasidu way gebogebayn kartaa heshiiska.

4) Kala duwanaansho kasta oo khuseeya qiimaha oo ka bata 10% oo heshiiska qiimaha asalka ah wuxuu shardi u yahay ansixinta Gudida Qandaraaska.

## Qodobka 50aad
## Ansixinta iyo Wax-ka-Badalka Heshiisyada

1) ansixinta bixinta heshiiska ee la soo jeediyay waxaa loo raaci doonaaa xadka bilawga ah ee lagu dajiyay Qodobka 98aad ee Wareegtooyinka.

2) Wax ka-bedelka heshiisyada waa inay ansixiyaan Gudida Qandaraayadda Qaranku haddii wax ka-bedelka heshiisku:

a) Ka badanyahay 10% ah qiimaha heshiiska ee asalka ah kaasi oo shardi u ahaa in ay ansixiyaan Gudida Qandaraasku;
b) Korna ugu qaada qiimaha heshiiska dib loo eegay illaa iyo heer u baahan ansixinta warbixinta heshiiska Gudida Qandaraaska.

**Qodobka 51aad**
**Diwaanada iyo Warbixinaha Qandaraaska**

1) Hay'ada mashruuca qandaraaska iska leh ama Guddida Qandaraasyadu waxay illaalin doontaa dhammaan diwaangelinta la xidhiidha heshiis kasta oo qandaraas iyo fadhiyadiisa/dhagaysigiisa iyada oo dabaqaysa xeerarka ku dabaqma ee khuseeya keydinta waraaqaha Dawladda, laakin waraaqaha ugu yar waxaa la illaalin doonaa mudo lix (6) sano oo la socota taariikhda kama danbaysta ah ee heshiiska qandaraaska, ama laga billaabo taariikhda diidmada dhammaan naadooyinka iyo tirtirida fadhiga, sida kolba xaaladu tahay.
2) Iyada oo la hirgalinayo shuruudaha ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan, Guddida Qandaraasyaddu waxa ay diyaarin doontaa warbixin guud oo mar ah kuna saabsan nidaamyada qandaraasida oo ay ku jiraan waraaqahan soo socda:-

a) Faah-faahin ku saabsan shayga la qandaraasayo.
b) Warbixin ku saabsan sababta xulashada ee nidaamka qandaraas bixinta oo aan ahayn naadada tartanka furan ama dalabka codsiyada adeeg bixineed.
c) Nuqulo ah dalabka soo gudbinta qorshaha codsiga.
d) Naadinta, codsiga qorshaha iyo waraaqaha qiimaynta hore kuwaas oo ay ku jiraan qiimaynta naadada ama qorshaha codsi ee qiimaynta iyo shuruudaha laga rabo tartamaha.
e) Diwaan ka qaybgalayaasha tartamayaasha ah, taariikhdooda iyo shuruudaha qiimaynta hore ee la adeegsaday, iyo shuruudaha khibradeed lagu dabaqay;
f) Naadada ama qiimaha qorshaha.
g) Codsiyada cadaynta iyo jawaabaha jira.

h) Warbixinta ku saabsan sababta yaraynta mudada diyaarinta naadada.
i) Guudmarka qiimaynta naadooyinka, qorshayaasha iyo shuruudaha.
j) Warbixin buuxda oo qiimaynta naadada ah, qorshayaasha iyo qiimaynta hore ee qandaraaslayaasha;
k) Guudmarka dib u'eegis kasta oo nidaamada ah iyo go'aanada jira;
l) Warbixin ku saabsan sababaha tirtirida nidaamada qandaraaska iyo/ama diidida dhammaan naadooyinka iyo qorshayaasha;
m) Maamulida heshiiska iyo iyo warbixinaha bixinta, oo ay ku jiraan cadaymaha rasiidhada; iyo
n) Warbixinaha kale sida kolba looga baahdo Wareegtooyinka lagu xusay Xeerkan.

3) Qaybta diwaanka ku xusan Farqadaha (2) (a),(c), (d),(f), iyo (g) waxa haddii la codsado, la siin karaa qof kasta ka dib marka naadada,qorshaha dalab, dalab ama qiime sheeg la aqbalo ama nidaamyada qandaraaska la tirtiro iyada oo aysan ka dhalan heshiis qandaraas.

4) Qaybta diwaanka ee lagu xusay Farqada ee (2), (i) iyo (l) waxa haddii la codsado, la siin karaa qaybiyayaasha, qandaraaslayaasha iyo lataliyayaal ku waasi oo gudbiya naadooyinka, qorshayaasha, dalabyada, ama codsiyada ama qiimaynta hore loo adeegsado, ka dib marka naadada, qorshaha, dalabka la aqbalo ama marka fadhiyada qandaraasida la tirtiro iyada oo aysan ka dhalan heshiis qandaraas bixin ahi.

5) Guddida Qandaraasyadu ma daah furi doonto:-

(a) Warbixinta, haddii daahfurkaasi sababayo:
   i. Uu ka soo horjeedo xeerka;
   ii. Xanibayso fulinta sharciga;
   iii. Aysan ku jirin danta guudi;
   iv. Ay khatar ku tahay danaha xaqa ah ee ganacsi ee dhinacyada; ama
   v. Ay xanibaso tartanka xalaasha ah ee ku xusan Xeerkani.

(b) Warbixinta la xidhiidha baadhida, qiimaynta iyo isbarbardhigida naadooyinka, qorshayaasha,

dalabyada, ama qiime sheegta aan ahayn sida ku xusan farqadda 2aad ee Qodobkan.

6) Diwaanada iyo qoraalada ay isticmaasho Gudddida Qandaraayaddu ee ku xusan Xeerkan waxaa lagu samayn doonaa baadhid ay sameeyaan Guddida la dagaalanka Musuqmusuqa, iyo Hantidhawraha Guud marka la codsado.

## Qodobka 52aad
## Anshaxa Saraakiisha Dawladda, Tartamayaasha iyo Qaybiyayaasha/Ganacstada

Saraakiisha Dawladda ee ku lug leh qandaraas bixinta dawladda iyo dhammaan tartamayaasha iyo qaybiyayaashu/ganacsatadu waa inay ay ku dhaqmaan hab raacyada xeerkan iyo Xeerarka kale.

## Qodobka 53aad
## Ka Reebida Qaybiyayaasha/Ganacsatada, Qandaraaslayaasha, iyo La-taliyayaasha

1) Guddidu waxay ka madnuuci karaa tartamaha, shirkada ganacsi, Qandaraaslaha ama Lataliyaha ka qayb qaadashada qandaraasida dawladda muddo ugu yaraan ah hal sano iyo muddo ugu badnaan shan sano ka dib:

a) Marka ay la tashadaan hay'ada mashruuca qandaraaska ah iska ee la saameeyey si ay u eegto dhammaan xaqaa'iqa kiiska;
b) Iyada oo ogaysiis macquul ah la siinayo tartamaha, qaybiyaha/qaybiyaha, Qandaraaslaha,ama Lataliyaha ku lug leh xaalada talaabada la soo qorsheeyey; iyo
c) Iyada oo fursad macquul ah la siinayo tartamaha, qaybiyaha/ganacsadaha, Qandaraaslaha,ama Lataliyaha si looga jawaabo talaabada la soo qorsheeyey.

2) Qaybiyaha, Qandaraaslaha ama Lataliyaha suurtogalka ah waxaa laga joojin doona ka qaybqaadashada qandaraasida sababahan soo socda:

a) Qodobka ku saabsan waribixin qalad ah oo lagu bixiyay nidaamka la gudbinayay naadada ama qorshaha;

b) Heshiiska qarsoodiga ee udhaxeeya tartamayaasha oo ah mu'aamarad, ama tartamaha iyo sarkaalka dawladda ee khuseeya qaabaynta dhinac kasta oo waraaqaha naadinta ah;
c) Qarsoodi u shaqaynta si loo faro geliyo ka qayb qaadashada tartamayaasha tartamay;
d) Dhaqan xumo la xidhiidha gudbinta naadooyinka, oo ay ku jiraan musuqmaasuq, mu'aamarad, khasab(jujuub), carqaladayn qiime xadidid, qorshe qiimaha naadooyinka aan si aan caadi ahayn hoos loogu dhigo, ku xadgudubka kalsoonimada/dhawrsanaanta, iyo dhaqan xumooyinka kale;
e) Gudasho la'aanta waajibaadyada heshiiska ee ku xusan heshiiska loo qaadanayo in ay ku filantahay in la sameeyo ka maanicid, iyada oo ay shardi tahay in gudasho la'aanta aysan keenin duruufo ka baxsan xakamaynta qaybiyaha, qandaraaslaha, ama la taliyaha;
f) Ku xukumida dambi ciqaab ah oo la xidhiidha helida ama isku dayida in la helo heshiis ama heshiis hoose;
g) Bixin la'aanta waajibaadka cashuuraha ka dib qiimaynta wakiil cashuurta macaashal macaashka ama lunsi cashuureed si ay doontaba ha u dhacdee; ama
h) Ku xukumidda ciqaab la xidhiidha ganacsiga ama hawlqabadyada xirfada.

3) Shakhsiyaadka leh shirkadaha la mamnuucay iyo shirkado kasta oo ay sameeyeen ka dib mamnuucida waxaa loo tixgelinayaa in la mamnuucay illaa iyo mamnuucida laga qaadayo.

## Qodobka 54aad
## Xadka Doorbidida Dalka Gudihiisa iyo Hawlqabadka Doorbidida

1) Guddida Qandaraasku waxay marka loo eego qaababka iyo qodobada lagu dajin karo Wareegtooyinka, ogolaanayaan xadka doorbidida gudaha ah marka ay qiimaynayaan naadooyinka sida ku xusan Tartanka Naadaynta ee Furan:

(a) naadooyinka keenaya badeecad lagu sanceeyay, laga qodey, laga dheegay ama laga beeray Soomaaliland dhexdeeda marka la barbardhigo naadooyinka keenaya badeecad lagu sanceeyay, laga qoday, laga dheegay ama beeray wadan ajanabi ah; iyo

(b) Naadooyinka qandaraaslayaasha dalka gudihiisa marka la barbardhigo naadooyinka ay dalbeen qandaraaslayaal ajaanib ah.

2) Shuruudaha tixgelinta doorbidida dalka gudihiisa iyo hababka xisaabinta faa'iidooyinkan doorbidida waxaa lagu sharxi doonaa Wareegtooyinka.
3) Faa'iidada doorbidida guduhu waxay ahaan doontaa 15% alaabaha iyo 10% qandaraaslayaasha waxaana lagu sheegi doonaa waraaqaha naadada.
4) Xaaladaha la horumarinayo koox tilmaaman, ama bulsho, qayb ka mid ah dhaqaalaha, Guddida Qandaraasyadda Qaranku waxa ay go'aamin kartaa xadi iyada oo isticmaalaysa habka doorbida marka ay qandaraaska bixinayso. Shuruudaha iyo habraacyada habka doorbidista waxa lagu faah-faahin doonaa Wareegtooyinka,

## QAYBTA 6AAD
## NIDAAMADA IYO HABABKA QANDARAAS BIXINTA

### Qodobka 55aad
### Doorashada Habka Qandaraas Bixinta

1) Qandaraas bixinta qaranka waxaa lagu fulin doonaa qaab ah nidaamo naadayn tartan furan ah, iyada oo fursad isku mid ah la siinayo dhammaan tartamayaasha u qalma ee buuxiyay shuruudihii iyada oo aan la kala saarayn (faquuqayn). Hababka kale ee qandaraas bixinta waxaa loo isticmaali doonaa marka ay jirto cudur daar sida lagu sheegay Qaybta 8aad ee Xeerkan.
2) Heshiisyada qandaraas bixinta lama qayb-qaybin karo iyadoo oo looga jeedo in laga baxsado qandaraasida tartanka furan ee ay farayaan dhammaan heshiisyada la qiimeeyay kharashkooda ee ah in ka badan hal min-qiyaas maaliyadeed oo bilow ah oo lagu abuuray Wareegtooyinka.

3) Haddii Gudida Qandaraaska qaranku isticmaasho hab qandaraas bixineed oon ahayn xayaysiinta naadada tartanka furan leh sida lagu xusay Xeerkani, waxaa lagu diwaangelin doonaa diwaanka nidaamada qandaraaska sababta loo doortay habka qandaraas bixinta.
4) Haddii ka qayb galida bulshada ka faa'idaystayaasha ahi ay keenayso kor u qaadida dhaqaalaha, tayada ama jiritaanka adeega la qandaraasayo, bulshadu waxay ka qayb qaadan kartaa qandaraasida iyada oo raacaysa habraacyada lagu xusay Wareegtooyinka.
5) Gudida Qandaraaska qaranku waxay dooran doontaa nooca heshiiska si ay u adeegsato qandaraas bixin gaar ah.

## Qodobka 56aad
## Naadinta Tartanka Furan

1) Nidaamyada naadada tartanka furan waxaa ku jiri karra heerka qiimaynta hore ama waxa la adeegsan doonaa nidaamka qiimaynta ee danbe inta ka horeysa bixinta heshiiska waxana lagu fulin karaa hal heer oo kaliya ama laba heer.

2) Naadaynta tartanka furan waxaa lagu qaban karaa laba-heer xaaladahan soo socda: -

a) Marka aanay suurtogal ahayn si dhamaystiran loo qeexo cayimaada farsammo ama heshiis ee qandaraasida si loo helo naadooyinka tartama.

b) Marka Gudida Qandaraasku doonayso inay tixgeliso xalinta kala duwan ee farsameed ama heshiis, lagalana hadlo tartamayaasha wixii ku saabsan qalmida iyo kala duwanaanshaha inta aysan go'aansan cayimaadaha farsameed iyo heshiis ee ugu danbeysa iyo asalka heshiiska.

3) Naadaynta tartanka furan wuxuu ku salaysnaan doonaa Qoraalada Heerka Habsami ee Naadaynta ee uu soo saaray Guddidu laguna diwaangeliyay si waafaqsan Xeerkan iyo Wareegtooyinka.

## Qodobka 57aad

## Tartanka Naadaynta Dawladda (TNQ)

1) Gudida Qandaraaska Qaranku waxay isticmaali doontaa nidaamada Tartanka Naadada Furan ee Dawladda haddii xadiga la qiyaasay ee heshiisku uu yahay xadiga bilawga ah ee lagu xusay Qodobka 98aad.
2) Gudida Qandaraaska qaranku waxay cayimi kartaa waraaqaha naadaynta in naadiyayaashu sheegaan qiimaha kaliyaata lacagta dalka lacag biximahana waxaa lagu samayn doonaa dhammaantood lacagta dalka.

## Qodobka 58aad

## Naadada u Furan Tartanka Caalamiga ah

1) Gudida Qandaraaska Qaranku waxay isticmaali doontaa habraaca Naadada Tartanka furan ee Caalamiga ah marka xadiga odoroska heshiiska uu ka sareeyo qiimaha saddex laabka ah lagu cayimay Qodobka 98aad.

2) Naadada Tartanka ee Caalami ahaan furani waxaa la isticmaali karaa mar kasta oo naadaynta tartanka furan loo isticmaalo tartartan wax ku oolka ahna aan la helin karin haddii aan shirkado ajanabi ah aan lagu casuumin in ay ka qayb galaan.

3) Marka lagu daro habraacayada ku xusan Xeerkan, kuwan soo socdaa sidoo kale waxaa loo adeegsan doonaa naadada tartanka ee caalami ahaan furan:-

- (a) Yeedhitaanka naadada iyo waraaqaha naadadu waa in ay ahaadaan Ingriisi.
- (b) Yeedhmada naadada waxa lagu soo qori doonaa jaraa'id oo leh akhris ku filan si loo soo jiito tartanka qalaad sida lagu xusay Wareegtooyinka.
- (c) Cayimaadaha farsameed waa inay waafaqsanaadaan shuruudaha dawladda waxana lagu salayn doonaa heerarka habsami ee caalamiga ah ama heerarka habsami ee si guud ahaana loogu adeegsado ganacsiga caalamiga ah waxana ay gaar ahaan waafaqi doonaan farqadaha Qodobka 41aad.
- (d) Tartamayaasha waxaa loo ogolyahay inay u muujaan naadadooda, iyo sidoo kale waraaqahooda

damaanada ee ay soo jeedinayaan iyagu, oo ku qoran lacagta dalkooda, ama lacagta si aada loogu adeegsado gacansiga caalamiga ah laguna xusay waraaqaha naadinta.

(e) Shuruudaha guud iyo kuwa ahaaneed ee heshiisku waxay ahaan doonaan noocyo guud ahaan loo isticmaalo ganacsiga caalamiga ah.

## Qodobka 59aad

## Muddada Loo ogolaaan Doono Gudbinta Naadooyinka

Si loo siiyo wakhti ku filan oo yeedhmooyinku ku gaadhaan tartamayaasha loona awood siiyo iyaga inay diyaariyaan oo gudbiyaan naadooyinka ama codsiyada, Gudida Qandaraaska Qaranku waxay ogolaan doontaa ugu yaraan:

**a)** Sodon (30) cisho sida ku xusan Naadinta Tartanka dalka gudihiisa;

**b)** Shan iyo Afartan (45) cisho sida ku cad Naadada Tartanka Caalamiga ah si loogu soo gudbiyo naadada iyo codsiyada qiimaynta hore.

# QAYBTA 7AAD

# FADHIYADA QANDARAASKA EE TARTANKA NAADINTA FURANLI.

## Qodobka 60aad

## Dalabka ka Qaybqaadashada Nidaamada Naadinta

1) Yeedhmada in la sameeyo naadin, ama yeedhamada qiimaynta hore, waxaa lagu daabici doonaa ugu yaraan hal jaraa'id oo dawladda oo aad loo akhristo haddii ay suurtogal tahayna Faafinta Rasmiga ah iyo joornaalka qandaraaska ama ciwaanka barta internetka xaalada Tartanka Naadaynta Caalamiga ahna, sidoo kale warbaahinta caalamiga ah ee la doortay iyada oo la raacayo hagayaasha ay sameeyaan Guddidu. Guddoomiyaha Gudidu wuxuu Wareegto ahaan ku tilmaami karaa jaraa'idka kaas oo naadooyinka lagu soo xayaysiinayo waxaanu siin doonaa tilmaan bixino dheeraad ah daabacaadda ogaysiisyada qandaraaska.

2) Yeedhmada naadada ama, sida kolba xaaladu tahay, yeedhmada qiimaynta hore waxa ku jiri doona warbixinta ku saabsan:-

(a) Aqoonsiga iyo ciwaanka Hay'ada Qandaraaska iska leh;
(b) Nooca iyo muddada loo xadiday qandaraaska, oo ay ku jirto goobta la keenayo alaabada ama adeegyada iyo goobta hawlaha dhismaha;
(c) Habka helida iyo qiimaha waraaqaha naadinta ama haddii ay ku dabaqanto/lagu dhaqo, waraaqaha qiimaynta hore;
(d) Goobta iyo wakhtiga ugu danbeeya iyo habka gudbinta naadooyinka ama codsiyada qiimaynta hore;
(e) Arrimaha kale sida kolba lagu sharxo Wareegtooyinka iyo qoraalada heerarka habsami ee naadinta ee la iska rabo (standard) iyo qaababka ama hagayaasha ay soo saareen Guddidu.

## Qodobka 61aad
## Waraaqaha Naadinta

1) Gudida Qandaraaska Qaranku waxay siin doontaa, hab degdeg ah oo aan kala sooc lahayn, waraaqaha naadinta dhammaan tartamayaasha suurtogalka ah kuwaasi oo ka soo jawaabay yeedhmooyinka ama, xaalada nidaamada qiimaynta hore, ee dhammaan tartamayaasha qiimaynta hore loo sameeyay. Qiimaha lagu dalacayo naadada waraaqaha waxaanay muujin doonaan oo kali ah qiimaha daabacaada iyo qiimaynta waraaqaha sida lagu xusay Wareegtooyinka.

2) Waraaqaha naadinta waxay ku wargelin doonaan tartamayaasha: -

(a) Dabciga iyo muddada loo xadiday qandaraaska, oo ay ku jirto laakiin aan ku xadidnayn cayimaadaha farsameed, tixraacida dib loogu noqon karo, shuruudaha heshiiska ee qandaraaska, iyo habka loo hirgelinayo heshiiska;
(b) Shuruudaha hore ee looga baahanyahay tartamaha haddii habraaca qiimaynta hore aan la raacin;

(c) Warbixinta khuseysa tagida goobta iyo kulanada naadada ka horeysa;
(d) Tilmaan bixinta ku saabsan diyaarinta iyo gudbinta naadooyinka, oo ay ku jirto wakhtiga kama danbaysta ah ee soo gubdinta naadooyinka, wakhtiga iyo goobta furida naadada;
(e) Waxyaabaha lagu muujinayo qiimaha, lacagta ama lacagaha qiimaha naadada lagu sheegayo, iyo lacagta iyo xadiga sarifka ee loo adeegsanayo is barbardhiga naadooyinka;
(f) Qaabka iyo hab-raaca qiimaynta naadooyinka iyo xulashada tartamaha guulaystay, kuwaas oo dhammaan loo xisaabin doono lacag ahaan ama loo sheegi doono qaab ah shuruudo lagu guulaysto/lagu guul daraysto haddii ay dhammaantood suurtogal yihiin, ama haddii aysan suurto gal ahayn, culaysyada kale ee is barbar dhig ahaan. Iyadoo la tixraacayo habka qiimaynta Guddida Qandaraasyaddu waxay tixgelin kartaa kaliyaata kuwan soo socda:
    i. Qiimaha naadada, iyada oo ay shardi u tahay xadi kasta oo ah doorbidida gudaha ee loo adeegsado iyada oo la raacayo Qodobka 54aad; iyo
    ii. Kharashka hawlgelinta, illaalinta iyo dayac tirka alaabaha ama dhismayaasha, wakhtiga keenida alaabada, ama bixinta adeegyada, astaamaha shaqo ee alaabaha ama dhismayaasha, shuruudaha lacag bixinta iyo damaanadaha khuseeya alaabaha, shaqooyinka ama dhismayaasha.
(g) Minqiyaaska doorbidida gudaha, haddii ay jirto, alaabaha gudaha, qandaraaslayaasha iyo la-taliyayaasha sida lagu dhigay Qodobka 54aad;
(h) kooxayn kasta oo alaabo, dhismayaal ama adeegyo ah, oo loo kooxeeyo bushqado iyo xidhmooyin iyo habka qiimaynta bushqadaha iyo xidhmooyinka;
(i) haddii badalka cayimaadaha farsameed ama cayimaad heshiis la tixgelin doono, iyo haddii ay sidaas tahay, sida badalkani loo qiimayn doono;

(j) Haddii ganacsatada loo ogolyahay inay soo gudbiyaan naadooyinka kaliyaata qayb ka mid ah alaabaha, shaqooyinka dhisme ama adeegyada la qandaraasayo, sifo ku saabsan qaybta ama qaybaha kuwaasi oo naadooyinka loo soo gudbin karo;
(k) Muddada loo baahanyahay ansaxnimada naadada;
(l) Xadiga iyo qaababka la aqbali karo ee naado kasta oo loo baahanyahay, fulinta ama damaanada kale;
(m) Shuruudaha heshiiska ee lala geli doono tartamaha guulaysta;
(n) Ogaysiis ku saabsan xadidaadaha khillaafka daneed iyo xeerasha ka soo horjeeda khiyaanada iyo musuqmaasuqa;
(o) Habka ay tartamayaashu ku heli karaan dib u eegida falka, ka baaqsiga falka iyo go'aanada Guddida Qandaraasyadda; iyo
(p) Arrimaha kale kolba sida ay faraan Wareegtooyinka ama buuga tilmaan bixiyaha ama qoraalada heerarka habsami ee naadada ama qaab-beega ay dajiyeen Gudidu.

## Qodobka 62aad
## Gudbinta Naadooyinka

1) Naadada waxaa loo gudbin doonaa qoraal ahaan, iyada oo si dhamaystiran loo saxeexay lagu riday gal xidhan ama galal, haddii naadada aanay qaadi karrin gal kali ahi iyada oo la raacayo tilmaan bixinaha la siiyay tartamayaasha. Naadooyinka la helay ka dib marka uu dhaco waqtigii kama danbaysta ahaa ee gudbinta naadooyinka waxaa lagu celin doonaa tartamaha soo gudbiyay iyada oo aan haba yaraatee la furin. Yeedhmooyinka qiimaynta hore iyo waraaqaha naadada waxaa ay ogolaan doonaa gudbinta codsiyada si mar hore loo qiimeeyo ama naadooyinka gacanta lagu sido ama kuwa iimaylka ama lagu soo qaado wax kale iyada oo la siinayo fursad naadada.

2) Habka gudbinta iyo furida naadooyinka ee E-mail ahaan waxaa lagu ogolaan doonaa laguna sharxi karaa Wareegtooyinka, iyada oo ay shardi u tahay qarsoodiga iyo damaanada naadooyinka waa la hubin doonaa, iyada oo ay

ku jirto ka hortagida furida iyo akhriska naadooyinka qof kasta oo kale illaa iyo furida naadooyinka wakhtiga lagu dhigay iyadoo la raacayo Qodobka 64aad.

3) Naadadu waxa ay ansax ahaan doontaa muddada waqti ee lagu xusay waraaqaha naadinta. Wax ka badalka ama la soo noqoshada naadada xiliga naadadu ansaxa tahay waxa ay siin doontaa tartamaha in uu noqdo in uu la wareego damaanada naadada. Waqtiga ansaxnimadu waxa lagu fidin karaa oo kali ah iyada oo uu ogolyahay tartamaha ay khuseysaa. Tartamaha ku raaca waqtiga naadada la fidiyo waa in uu sidoo kale helaa fidintaasi oo ay la socoto damaanada naadada, haddii damaanadaasi loo baahanyahay.

## Qodobka 63aad
## Damaanada Naadada

1) Waraaqaha naadadu waxa ay fari karaan tartamayaasha in ay soo gudbiyaan damaanada naadada. Shuruudaasi waxa lagu dabaqi doonaa dhammaan tartamayaasha, waxa loo dajin doonaa iyada oo la raacayo Wareegtooyinka. La wareegida damaanada naadada waxa la soo rogi karaa xaaladahan oo kali ah:

a) Wax ka badal ama la noqoshada naado ka dib marka la dhafo waqtigii soo gudbinta naadada iyo inta lagu gudo jiro waqtiga uu ansaxa yahay;
b) Diidmada uu diido tartamuhu in uu aqbalo sixitaanka qaladka xisaabta ama soo gudbinta kale ee ka muuqda wajiga naadada;
c) Haddii tartamaha ku guulaystay uu ku guul daraysto in uu saxeexo heshiis iyada oo la raacayo shuruudaha lagu dajiyay dhakumantiyada naadada; ama
d) Haddii tartamaha ku guulstay uu ku guul daraysto in uu bixiyo damaanada heshiiska haddii in uu sidaas inuu sameeyo ay farayaan waraaqaha naadadu.

## Qodobka 64aad
## Furida Naadada

1) Naadada waxaa la furi doonaa waqtiga iyo meesha lagu xusay waraaqaha naadada kaas oo waafaqi doona waqtiga loo qabtay in la soo gudbiyo naadada, ama isla waqtigaasi, iyada oo loo ogolaanayo waqtiga ugu yar ee soo dhexgal sababo la xidhiidha dhinaca tasiillaadka.
2) Tartamayaasha iyo wakiiladoodu way ka soo qaybgeli karaan furida naadada.
3) Magaca tartamaha, xadiga lacageed ee ku xusan naado kasta, wixii khidmad ah (qiime dhimis ah), qaababka kale ee la soo jeediyo, ama jiritaanka ama jiritaan la'aanta damaanada naadada, haddii loo baahdo, iyo waraaqaha muhimka ah ee la socda waxa lagu akhrin doonaa si dhawaq dheer waana la diwaan galin doonaa, nuqul ka mid ah diwaankaasi waxa la siin doonaa naadiyahu marka uu codsado
4) Wixii qoraalo naado ah ee la soo gudbiyo ee leh cawaaqib lacageed waa in ay saxeexaan laba xubnood oo ka mid ah gudida furida naadada.
5) Wax go'aan ah oo ku saabsan cidii aan shuruudaha buuxin ama diido ah ee naado kasta laguma dhawaaqi karo ama lama gaadhi karo waqtiga furida naadada.
6) Marka furo naadada, iyo illaa iyo la gaadho go'aanka hordhaca ah ee cida heshay la ogaysiinayo tartamaha ku guulaystay, tartamaha ma samayn karo xidhiidh aan la dalban oo la xidhiidha Gudida Qandaraaska ama si uun uguma lugyeelan doono baadhista ay samaynaso Guddida Qandaraasyaddu iyo qiimaynta tartamayaasha.

## Qodobka 65aad
## Baadhida, Qiimaynta iyo Isbarbar Dhiga Naadooyinka

1) Ka dib furida naaddada, Gudida Qandaraaska Qiimaynta Codsiyadu waxa ay ugu horayn baadhi doontaa naadooyinka si nidaamsan si ay u go'aansadaan in naadooyinku ay dhamaystiran yihiin, saxeexan yihiin ama in waraaqaha loo baahanyahay ay sameeyeen ansaxsanaantii sharci iyo dhawrsanaantii naadada in la dhamays tiray iyo in naadooyinku ay u ka jawaabayaan

faah-faahintii farsamo iyo shuruudihii heshiis ee lagu xusay waraaqaha naadada.

2) Naadooyinka aanay la socon shuruudaha lagu xusay farqadad 1aad ee Qodobkan waa la diidi doonaa waana laga saari doonaa in la sii qiimeeyo is barbar dhigna lagu sameeyo.

3) Haddii habraaca qiimaynta hore la sameeyo, naadada laga helay cid kasta oon ahayn tartame hore loo sii qiimeeyay waa la diidi doonaa waana laga saari doonaa.

4) Naadooyinka aan laga reebin in la tixgaliyo sida ku cad farqadaha (2) iyo (3) waa la qiimayn doonaa iyada oo la raacayo qiimaynta iyo qaabka lagu xusay waraaqaha naadada.

5) Gudida Qandaraaska Qaranku waxa ay cadayn ka dalban kartaa tartamaha si loo fududeeyo qiimaynta laakiin ma waydiin karto umana ogolaan karo tartame in uu badalo qiimaha ama wax kale oo ka mid ah naadada. Haddii tartamuhu si uun wax uga badalo, naadadaasi waa la diidi doonaa damaanadii naadana waa lala wareegi doonaa.

6) Haddii uu khalad xisaabeed jiro, khaladkaasi waa sixi doonaa, tartamahana waa la ogaysiin doonaa. Haddii uu tartamuhu diido in uu aqbalo sixidaasi, naadadiisa waa la diidi doonaa dhawrsanaantii naadada waa lala noqon karaa. Haddii ay kala duwan yihiin lambarada iyo xuruufta, qadarka ku xusan xaraf ahaan ayaa la qaadan doonaa haddii aanu kala duwanaanshuhu ahayn calaamada jajabka (dhibicda) oon meesheedii ku dhicin (misplacement of decimal point), haddii ay sidaas tahay khaladkaasi waa la sixi doonaa tartamahana waa la ogaysiin doonaa.

7) Marka qiimayntaasi la wado, haddii ay jiraan kala duwanaansho yar oo ku xusan naado yar oon mutaysan in la diido oo ah naado xili hore la sameeyay, faraqaasi yar waa la qiimayn doonaa haddii ay suurto gal tahay. Qiimahaasi la qiimeeyay ee nadadaasi waxa dabadeeto la barbar dhigi doonaa kuwa naadooyinka kale si loo go'aamiyo naadada ugu hooseysa qiimaynta.

8) Haddii habraaca ay ku jirto qiimayn hore, tartamaha leh qiimaynta ugu yar ayaa la xaqiijin doonaa in uu tixgaliyo wax ka badal kasta illaa iyo qiimayntii hore.
9) Haddii qiimayn hore aan la samaynin, qiimaynta tartamaha ugu qiimaha hooseeya ayaa lagu qiimayn doonaa shuruudaha lagu xusay waraaqaha qoraalka. Haddii ay sidaasi dhici waydo, is hubintaasi lafteeda waxa loo samayn doonaa tartamaha ku soo xiga ee ugu qiimaha hooseeya, sidaasi baanay u sii soconaysaa iyada oo lagu kala sareeyo tirada.
10) Guddida Qiimayta Codsiyadu waxa ay diyaarin doontaa warbixin qiimeyneed oo faah-faahinaysa baadhista qiimaynta iyo xaqiijinta in cid la siiyo heshiiska iyada oo loo eegayo shuruudaha qiimaynta ee lagu xusay waraaqaha naadada.

## Qodobka 66aad
## Qarinta Faahfaahinta Qiimaynta Naadada

Marka laga reebo sida lagu xusay Qodobka 51aad (3) iyo (4) ee diwaanka qandaraaska bixinta, warbixinta la xidhiidha baadhida, cadaynta, qiimaynta iyo is barbar dhiga naadooyinka lama tusi karo dadka keenaya badeecada, la-taliyayaasha, ama qandaraaslayaasha ama qof kasta oo kale oon si rasmi ah ugu lug lahayn baadhida, qiimaynta ama is barbardhiga naadooyinka ama aan ku jirin go'aansiga naadada ee la qaadanayaa.

## Qodobka 67aad
## Mabnuucida Wada Xaajoodyada lala yeesho Ganacsatada iyo Qandaraaslayaasha

1) Iyada oo la raacayo mabnuucida ku xusan Qaybtan, ma dhici doonaan wax wada xaajood ah oo u dhexeeya Gudida Qandaraasyada Qaranka iyo ganacsatada ama qandraaslaha oo khuseeya naadada uu soo gudbiyay ganacsadahaasi ama qandaraaslahaasi.
2) Haddii naadada qandaraas ee ugu hooseysaa ay ka badato miisaaniyadda heshiiska oo leh xadi badan, Gudida Qandaraasyada Qaranka waxa ay baadhi doontaa sababta keentay kharashka dheeraadka ah waxana ay:-

a) Samayn doontaa in ay codsato naadooyin cusub; ama
b) Iyada oo ay shardi u tahay ansixinta Gudida Qandaraasku iyada oo la raacayo nidaamka ku jira wareegtooyinka iyo tilmaaha kale ee uu soo saaro Guddidu, waxa ay kala xaajoon doontaa heshiiska tartamaha ugu qiimaha jaban leh si ay isugu daydo in ay hesho heshiis lagu qanci karo iyada oo la dhimayo baaxada heshiiska kaas oo loo qaadan doono in la dhimay qiimahii heshiiska.

## Qodobka 68aad
## Bixinta Heshiiska

1) Heshiiska waxa la siin doonaa tartamaha soo gudbiyay qiimaynta ugu hooseysa uguna faa'iidada badan taas oo dhamays tirtay shuruudahii qiimaynta sida lagu xusay waraaqaha naadada.
2) Inta ka hooraysa dhicitaanka mudada ansaxsanaanta naadada, Gudida Qandaraasyada Qaranka waxa ay ogaysiin doontaa tartamaha ku guulaystay heshiiska la soo jeediyay. Ogaysiinta heshiiska la soo jeediyay waxa uu cayimi doonaa waqtiga ay tahay in la saxeexo heshiiska, iyada oo shardi looga dhigayo cabashooyinka soo dhex galay oo loo qaadan doono iyada oo loo eegayo Qaybta 12aad ee Xeerkan.
3) Si taas la mid ah haddii qiimaha heshiisku uu ka bato xadka lagu dajiyay Qodobka 98aad, ogaysiin baa la siin doonaa tartamayaasha kale, iyada oo la cayimayo magaca, iyo cinwaanka tartamaha ku guulaystay iyo qiimaha heshiiska.
4) Heshiiska lama saxeexi karo, illaa iyo 14 casho kadib, oo daba socda bixinta ogaysiintaasi si loogu ogolaado tartame kasta oo lagu gafay in uu cabasho keeno ama rafcaan qaato.
5) Haddii tartamaha la qaatay naadadiisu uu ku guuldaraysto in uu saxeexo heshiiska qoran, haddii in saxeexaasi looga baahnaa, ama uu ku guuldaraysto in uu damaanad looga baahday si uu u guto heshiiska bixiyo muddada loo qabtay, Gudida Qandaraasyada Qaranka

waxa ay aqbali doontaa tartamaha darajo ahaan ku soo xiga ee ku jira naadooyinka hadhsan ee dhaqan galka ah.
6) Marka la xulanayo tartamaha darajo ahaan ku soo xiga, Guddida Qandaraasyada Qaranka waxa ay waafaqi doontaa shuruudaha ogaysiinta ee lagu xusay farqadda 3aad ee Qodobkan.

**Qodobka 69aad**
**Aqbalaada Naadada, Dhaqangalka iyo Saxeexida Heshiiska**

1) Haddii waraaqaha naadadu ay ganacsadaha ama qandaraaslaha naadadiisa la aqbalay uga baahanyihiin in uu saxeexo heshiis qandaraas oo qoran oo u waafaqsan naadada, haay'ada qandaraaska iska leh iyo ganacsadaha ama qandaraaslaha waxa ay saxeexi doonaan heshiiska qandaraaska muddo 30 cisho ah ka dib ogaysiinta lagu xusay Qodobka 68aad (2) waxa loo diri doonaa ganacsadaha ama qandaraaslaha.

2) Haddii heshiis qandaraas oo qoran loo baahdo in la saxeexo, heshiiskaasi qandaraaska ahi waxa uu noqon doonaa dhaqangal marka heshiiska si dhamaystiran uu u saxeexo ganacsaduhu ama qandaraasluhu iyo Guddida Qandaraasyada Qaranka waxana uu waafaqi doonaa qodobada Xeerkani.
3) Heshiisyada waxa saxiixi doona wasiirka ama guddoomiyaha hay'adda ama qof si dhamaystiran loogu igmaday.

**Qodobka 70aad**
**Naadada Labada Heerah**

1) Nidaamyada naado lagu tartamo oo furan ee lagu dajiyay Qaybta 7aad waxa loo adeegsan doonaa laba heer nidaam oo naado, marka laga reebo xaalada wax lagaga badalo Qodobkani.
2) Heerka Koowaad: -
   a) Waraaqaha naadadu waxa ay ugu baaqi doonaan tartamayaasha in ay soo gudbiyaan naado hordhaca ah iyada oon xusayn qiimaha naadada. Qoraaladaasi waxa ay dalban karaan soo jeedimo bilaw ah oo la

xidhiidha farsamada, tayada, ama calaamadaha kale ee badeecada, dhismayaasha ama adeegyaada, iyo sidoo kale shuruudaha iyo mudooyinka/xaaladaha heshiiska la soo jeediyay, haddii ay ku habboonaatana, aqoonta farsamo iyo tan khibradeed iyo aqoonta tartamayaasha.

b) Gudida Qandaraasyada Qaranku waxa ay la gali kartaa wada xaajoodka dhammaan ama badh ka mid ah tartamayaasha ay codsigoodu ay buuxiyeen shuruudahii lagu xusay waraaqaha naadada iyada oo aragtidu tahay in la fahmo codsiyada ama in la tuso badalaad loo baahday si looga dhigo qaar la qaadan karo isla markaana la helo rabitaanka tartamaha ee ah in uu sameeyo wax ka badalkaasi.

c) Dhammaan wada xaajoodyada la galay xiligani waxa laga dhigi doonaa qoraal waxana ay ka mid noqon doonaan raadreebka qandaraas bixiyaha.

d) Marka uu dhammaado heerka kowaad, Gudida Qandaraasyada Qaranku waxa ay:-

   I. Waxa ay diidi doontaa naadooyinka aan la badalin isla markaana aan la badali karin si ay u dhaystirtaan shuruudahii assaaasiga ahaa, hawl-qabashada ugu hooseeysa ama u baahan waqti dhamaystir ama leh cilad kasta oo kale oo ka dhigaysa naadada mid aan si balaadhan uga tarjumayn baahidaasi; ama

   II. Waxa ay wax ka badali kartaa sifooyinka farsamo, qiimaynta shuruudaha, iyo shuruudaha heshiiska iyada oo raadsanasa in ay badiyaan tartanka oo ay sameeyaan qaabka ugu habboon ee qiimayneed.

3) Heerka Labaad:

   a) Gudida Qandaraasyada Qaranku waxa ay isugu yeedhi doontaa tartamayaasha ay naadadoodu aan la diidin si ay u gudbiyaan naado kama danbays ah oo leh qiimo dib loo eegay oo la socda waraaqaha naadada.

   b) Tartamaha aan jeclayn in uu soo gudbiyo naado kama danbays ah waxa uu kala noqon karaa fadhiyada naadada isaga oon la wareegaynin wax

damaanad naado ah oo uu tartamuhu u baahnaa in la siiyo.

c) Naadooyinka kama danbaysta ah waa la qiimayn doonaa waana la is bar-bar dhigi doonaa iyada oo la raacayo shuruuda iyo qaabka lagu xusay waraaqaha dib loo eegay ee naadada.

## QAYBTA 8AAD
## QAABABKA KALE EE NAADADA

### Qodobka 71aad
### Tartanka Xadidan ama la Xanibay

1) Gudida Qandaraasyada Qaranku waxa ay adeegsan doontaa tartan xadidan ama la xanibay oo badal u ah naadada lagu tartamo iyada oo ay shardi u tahay in gudida qandaraasku ay ansixiyaan, marka:

a) Badeecadda, dhismayaasha ama adeegyada laga heli karo oo kali ah tartamayaal kooban, marka,

b) Qandaraasku uu jawaab u yahay xaalad degdeg ah oo gurmad;

i. dalka waxaa si dhab ah mid ka mid halis ku ah ama si dhab ah ugu dhacday masiibo dabiici ah, masiibo kale, ama dagaal;

ii. nolosha ama tayada nolosha ama deegaanka laga yaabo in aanay si dhab ah u gudanin;

iii. si dhab ah xaalada ama tayada alaabada, qalabka, dhismaha ama khayraadka guud Qaranku leeyahay si aad u xun wax u yeelaya , haddii aan tallaabo degdeg ah oo ay daruuri tahay waa laga qaaday si ay u illaaliyaan in ay qiimaha dhabta ah ama faa'iidada; ama

iv. mashruuc maalgelin ah ay timaado muddo dhaaf aad u badani ay ku doonayaan in shay uu hoos u dhaco qiimahiisu.

2) Nidaamada naadinta tartanka furan sida lagu xusay Qodobada 56-65 waxaa lagu dabiqi karaa Naadooyinka Tartankoodu Xadiddan yahay.

## Qodobka 72aad

## Isticmaalka Kooxda Dhismaha ee Dawladda

1) Iyadoo loo shardinayo ansixinta gudida Qandaraaska, qandaraasida shaqooyinka dhismaha ee la isticmaalayo Hay'adaha Qandaraaska iska leh shaqaalahooda gaarka ah iyo qalabka loo isticmaalayo qandaraas gacan ka bixin ah habka qandaraasida waxaa la adeegsan doonaa:

a) Xadiga shaqo ee ku lugta leh aan marka horeba la qeexi karin;
b) Tartamayaasha aqoonta u lihi ay u badan tahay in aysan ku naadin doonin qiime macquula iyada oo ay sababtu tahay dabciga, goobta, agabka, maalgalinta ama hawlgalinta iyo fadhiisintuba aanay soo jiidan tartamayaasha.
c) Arrimaha dhawrsanaanta iyo damaanada waa laga tanaasuli doonaa haddii loo diro qandaraasle madaxa banaani;
d) Shaqada looga baahanyahay in la wado iyada oon la soo dhex galinayn hawlaha socda;
e) Khasaaruhu uu yahay qaar aan laga baaqsan karin oo soo dhexgalid ah ayna ku dhacayaan Gudida Qandaraaska balse aan ku dhacayn Qandaraaslaha madaxbanaan;
f) Ay jiraan gurmad degdeg ah oo u baahan feejignaan buuxda.
g) Arinku uu ahaa barnaamij soo socday, gudida Qandaraaska ay dhistay awoodeeda gudeed ee hawlo gaar ah laguna daray qorshaha qandaraaska; iyo
h) Lagu muujiyay in qandaraaska gacan ku hayntu uu yahay qaabka kali ah ee xal ee lagu dhisi karo laguna dayac tiri karo shaqooyinka ku xusan duruufaha khaaska ah ama horumarka farsamada ama qaabka shaqada ama labadaba kuwaas oon wali lagu wadi karin haay'ada sida gaarka ah loo leeyahay.

2) Haddii qandaraaska badeecaddu, hawlaha qandaraaste sii bixiyay ama adeegyada looga baahdo in ay kabaan

qandraaska gacan ku haynta, qandaraaskaasi waxa loo wadi doonaa si waafaqsan Qodobada Xeerkan.

## Qodobka 73aad
## Codsiga Qiima-sheegta

1) Nidaamka codsiga qiima-sheega Qandaraaska waxa la wadi kara marka qandaraaska la qiyaasay ee qadarka badeecada, dhismayaasha ama adeegyada farsammo ay ka hooseeyaan sadex laabka qiimaha ugu yara ee lagu xusay Qodobka 98aad.

2) Marka nidaamka codsiga qiima-sheegta lagu shaqaynayo sababaha lagu xusay Qodobka farqadda 1aad ee Qodobkan, Gudida Qandaraasku waxay ogolaan doontaa qiima-sheegyo ah tirada ugu yar saddex (3) tartame oo u qalma, oo lagu soo doortay qaab aan kala saarid lahayn.

3) Dalbashada qiime sheegyada waxa lagu salayn doonaa iyada oo la adeegsanayo waraaqo la fududeeyay kuwaas oo xusi doona faah-faahinta iyo xadiga badeecadeed ama baaxada hawsha dhisme, waqtiga keenida ee la damacsanyahay ama waqtiga dhamaystiranka, meesha iyo waqtiga loo soo gudbinayo qiime sheegyada, shuruudaha qiimaynta iyo bixinta heshiiska. Tartamayaasha waxa la siin doonaa waqti ku filan iyada oo la raacayo Wareegtooyinka si ay u diyaariyaan una soo gudbiyaan qiime sheegyadooda.

4) Tartamayaashu waxa kali ah oo ay soo gubdin doonaan hal qiimo-sheegiseed taas oo lagu soo gubdin doono waraaq ahaan, fagax ahaan, ama qaab elegtarooni ah. Haddii ay suurto gasho qiimo sheegyada waxa lagu gayn doonaa waqtiga loo cayimay halkaas baana isla markaaba lagu furayaa. In dadka hortooda lagu furo naadada loo baahan maayo balse qiimaynta qiime sheegyada waxa ay raaci doonaan mabaadii la mid ah kuwa naadada tartanka furanleh ee lagu xusay Qaybta 7aad.

5) Heshiiska qandaraaska waxa la siin doonaa ganacsadaha, qandaraaslaha ama adeeg bixiyaha bixiyay

qiime sheegtii ugu qiimaha hooseysay isla markaana buuxiyay shuruudihii hay'ada qandaraaska iska leh.

6) Tartamayaasha looma ogolaan doono in ay badalaan qiime sheegta wax gorgortan ahna dhici maayo oo ka dhexeeya gudida qiimaynta iyo qandaraaslaha oo ku saabsan qiime sheegida uu soo gubdiyay tartamuhu.
7) Tartamaha keenay qiime sheegta ugu qiimaha hooseysa ee buuxiyay shuruudaha keenista iyo shuruudaha kale ee hay'adda qandaraaska bixisay ayaa la siin doonaa qandaraaska.

## Qodobka 74aad
## Qandaraaska Tooska ah

1) Gudida Qandaraasku waxa ay adeegsan kartaa habraaca tooska ah ee heshiis la galida hal meel ka imanasa xaaladahan soo socda:

a) Marka qandaraasku uu ku saabsan yahay muddo kordhinta heshiis jira ama badeeco nooc ah, dhismayaal ama adeegyo farsammo, oo lagu bixiyay iyada oo la raacayo habraacyada lagu dajiiyay Xeerkani. Guddida Qandaraaska waxa lagu qancin doonaa xaaladaha aan wax faa'iido ah laga heli doonin haddii la sameeyo tartan dheeraad ah iyo in qiimaha qandaraaska la balaadhiyay ay yihiin qaar macquula.
b) Haddii iib ka dheeraad ah oo la siiyo ganacsadaha asalka ah loogu cudur daari karo iyada oo ay sababtu tahay in la isku miisaamo qalabka ama qalabka badalka u ah (standardization of spare parts), ee u dhigma qalabka jira. Gudida Qandaraas bixinta waxa lagu qancin doonaa xaaldaha aan wax faa'iido aan laga heli doonin in la sameeyo tartan kale iyo in qiimaha heshiiska la balaadhiyay ay yihiin macquul.
c) Marka qalabka loo baahanyahay ay leeyihiin oo laga heli karo oo kali ah hal meel.
d) Marka qandaraasluhu uu ka masuul yahay nidaamka qaabaynta uunu u baahanyahay iibka alaab khatara oo uu leeyahay ganacsade gaar ahi taas oo shuruud u ah bixinta damaanada.

e) Xaalado gaar ah oo ay keentay baahi degdeg ahi oo ay ugu wacantahay gurmad deg-deg ah, iyada oo ay shardi tahay in duruufaha keenay degdegsiimahaasi ay ahaayeen qaar aysan sii saadaalin karin hay'ada qandaraaska lihi isla markaana aan ahayn natiijo ka dhalatay dabeecad habsan ah oo ka timid dhinaceeda.

2) Haddii Gudida qandaraasyadu ku lug yeelato qandaraas toos ah oo ah shuruudaha lagu xusay farqadda 1aad ee Qodobkan, waxa ay diyaarin doontaa faah-faahin qoraal ah oo ka mid ah baahideeda wixii shuruudo ah ee lagama maarmaan ah sida tayada, xadigga, shuruudaha, iyo waqtiga keenista;
3) Gudida qandaraasyadu waxa ay markaas ka dib codsan doontaa in loo gudbiyo naado ama soo jeedin qoraal ah waxana ay u fasax noqon doontaa in ay kala xaajooto qandaraaslaha kaliyaata.

4) Haddii qiimaha la qiyaasay ee heshiisku uu ka bato xadiga bilawga ah ee lagu xusay Qodobka 98aad, ogaysiinta bixinta qandaraaska tooska ah ee fadhigiisa waxa lagu qori doonaa ugu yaraan hal wargays oo dawlad oo aad loo akhristo, haddii ay suurto gashana waxa lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah, Wargayska qandaraasyada ama mareegaha websaydyada.

## QAYBTA 9AAD
## QANDARAASIDA ADEEGYADA LA TALINTA

### Qodobka 75aad
### Xadiga Adeegyada La Talinta

1) Adeegyada la talinta ah waxaa loo adeegsan doonaa adeegyada dabci ahaan la-talin iyo maskax ku dhisan, kumana jiraan noocyada kale ee adeeg bixineed taas oo hawl qabadka jidh ahaaneed ka bato oo uu keenayo natiijada laga rabo hawl qabadka.

2) Gorgortanku waxa uu muhiim u yahay qandaraasida adeegyada la talinta ah. Habraacyada iyo hagayaasha lagu

fuliyo gorgortan kaasi waxa lagu sharxi doonaa wareegtooyinka.

3) Hay'adaha dawladu waxay dooran doontaa nooca heshiiska loo isticmaalayo ee xaalad gaar ahaaneed.

### Qodobka 76aad
### Iska Hor Imaadka Danaha

1) La-taliyuhu waxa uu siin doonaa talo khibrad leh, oo dhexdhexaada, oon dhana raacsanayn isaga oon danaynayn shaqo mustaqbalka imaan doonta, waxa uu talada u bixin doonaa si aan ka hor imaanayn shaqo uu u cid kale u hayo iyo danaha gaarka ah ee shirkadiiisa.
2) La taliyaha looma diran karo wax hawla taas oo ka hor imaanaya waajibaad hore ama waajibaad hada taagan. La-taliyayaasha ma diran karto Haay'ada dawladeed xaaladahan soo socda:-

a) Shirkada ama shakhsiyaadka iyo cid kasta oo ku xidhan taas oo ku lug lahayd gudida qandaraasyadu si ay inoo siiyaan tala-bixin looma diran karo in uu keeno badeecad, dhisme ama adeeg xidhiidh la leh adeegyada talo bixineed.
b) La-taliyayaasha iyo cid kasta oo ku xidhan looma diran karo hawlaha ka hor imaanaya hawl kale oo uu la-taliyuhu hayo.
c) La-taliyaasha (oo ay ku jiraan shaqaalahooda iyo qandaraastayaasha u shaqeeyaa) ee leh ganacsi ama xidhiidh bulsho oo xubno ka mid ah shaqaalaha gudida qandaraasyada kuwaas oo si toos ah ama aan si aan toos ahayn ugu lug lahaa diyaarinta shuruudaha shaqo ee heshiiska, ama nidaamka diyaarinta ee kormeerka heshiiskaasi lama shaqaalaysiin karo heshiiskaasi.

### Qodobka 77aad
### Urudada ka Dhexeeya La Taliyayaasha

1) La-taliyayaashu waxa ay wada yeelan karaan muddo dheer ama hawl gaar ah qaab is kaashi ah ama sii bixin heshiis hoosaad si ay u dhamaystiraan meelaha gaarka ah ee ay khibrada u leeyihiin ah si ay u xoojiyaan soo jeedimahooda ayna keenaan khabiiro dheeraad ah,

bixiyaan qaabab ka wanaagsan iyo oo qaab la raaco ah, xaaladaha qaarna ay bixiyaan qiime ka hooseeya.

2) Gudida Qandaraasyadu kama dalban karto la-taliyayaasha in ay la midoobaan shirkad ama shirkado gaar ah, balse waxa ay ku dhiiri galin doontaa in ay la midoobaan shirkadaha aqoonta u leh ee waddaniga ah.

3) La midoobida shirkadaha liistada hordhaca ah ku jiray waxa kali ah oo la ogolyahay haddii heshiis hore oo qoraal ah laga helo Gudida Qandaraasyada .

### Qodobka 78aad
### Tababarka ama Gudbinta Cilmiga

Haddii hawsha loo diray la-taliyaha ay ku jiraan qayb tababar ah ama gudbin cilmi ah oo la siinayo shaqaalaha Gudida Qandaraasyada ama hay'ada dawladeed ee la-taliyaha qaadanaysa ama la-taliyayaasha kale, shuruudaha shaqada waxa lagu xusi doonaa ahdaafta, dabciga, nooca, baaxada iyo wax soo saarka barnaamijka tababarka oo ay ku jiraan faah-faahinta tababaraasha iyo la tababarayaasha, xirfadaha la siinayo, waqtiga lagu talo galay iyo isku duba-ridka dabagalka iyo qiimaynta. Qiimaha barnaamijka tababarka waxa lagu dari doonaa heshiiska la-taliyaha iyo miisaaniyadda loo diray.

## QAYBTA 10AAD
## XULASHADA KU SALAYSAN TAYADA IYO QIIMAHA

### Qodobka 79aad
### Xulashada Ku Salaysan Tayada iyo Qiimaha

1) Dhammaan qandaraas bixinta adeegyada la-talinta waxay raaci doontaa hab doorashao ku salaysan tayada iyo qiimaha kuwaasi oo isticmaala habka tartanka ee u dhaxeeya shirkadaha la xushay waxaanay xisaabta ku darsan doontaa tayada qorshaha farsameed iyo kharashka adeegyada ee doorashada shirkada guulaysatay. Hababka kale ee doorashada waxaa loo isticmaali doonaa ka reebid ahaan sida lagu bixiyay Qodobka 98aad illaa 105aad.

2) Culayska khuseeya ee tahay in la siiyo xadiga iyo qiimaha waxaa la go'aamin doonaa xaalad kasta iyada oo ku xidhan dabciga hawsha la qabanayo.

3) Gudida Qandaraasyadu ama/iyo hay'ada qaadanaysa la-taliyuhu waa inay isticmaashaa heer habsami ee " Dalabka Qorshaha" taasi oo ay ku jiri doonto Warqad Yeedhmo ah, Warbixinta La-taliyayaasha, Shuruudaha la-tixraaci doono iyo heshiiska la soo jeediyay.

**Qodobka 80aad**

**Soo Dhajinta Liistada Hordhaca ah ee La-aliyayaasha**

1) Markasta inta aan loo yeedhin in ay soo gudbiyaan codsigooda la-taliyayaashu waxaa soo dhajin doona Gudida Qandaraasyada ama hay'ada qaadanaysa. Liistada la soo dhajiyay waxa ay ka koobnaan doontaa la-taliyayaasha isu kooxda ah iyo kuwa isku awooda iyo ahdaafta ah. Liistada ma ahaan doonto mid dabada ka furan balse waxa ay ka koobnaan doontaa 3 illaa 6 ama tirada kale oo uu ogolaan doono Gudida/hay'adu iyada oo raacaysa hagayaasha.

2) Marka qiimaha la qiyaasay ee qandaraasku uu ka bato inta bilawga ah ee lagu xusay Qodobka 98aad si loo sameeyo liistada hordhaca ah Gudida qandaraasku waxa ay dalban doontaa dalabyada danaynaya iyada oo si furan u xayaysiinaysa shirkadaha si ay u soo codsadaan si ay uga dhex xushaan liistada hordhaca ah.

3) Yeedhmooyinka dalabka danaynta ah waxa lagu daabaci doonaa ugu yaraan hal wargays oo dawlad oo aad loo akhristo, haddii ay suurto galtahayna Faafinta Rasmiga ah, wargayska qandaraaska ama mareegta (barta internetka). Meelaha ku habboona, ogaysiinta waxa lagu daabici doonaa wargays ganacsi ama wargays xirfadeed ama farsamo.

4) Guddoomiyaha Guddidu wuxuu Wareegto ahaan ku cayimi karaa jaraa'idada dalka ka soo baxa ee yeedhmooyinka qiimaynta hore lagu xayaysiin karo waxanu siin karaa tilmaan bixino dheeraad ah oo khuseeya daabacaada ogaysiisyada qandaraas bixinta.

5) Gudida Qandaraasyadu/hay'adda qaadanaysa la-taliyuhu waxa ay siin doontaa waqti ku filan la-taliyayaasha si ay u diyaariyaan codsigooda oo aan laakiin ka yarayn 14 casho oo ka billaabmaysa maalinta la soo

qoro xayaysiiska illaa iyo waqtiga loo qabtay soo gudbinta dalabyada danaynta ah.
6) Liistada hordhaca ah waxa laga dhex xulan doonaa dadka ka soo jawaabay yeedhmada dalabyada danaynta lehna awooda in ay qabtaan adeegyada loo baahanyahay, sida lagu xusay soo gubdin tooda.
7) Yeedhmada dalabyada danaynta ah waxa ku jiri doona magaca iyo cinwaanka Gudida  qandaraaska ama hay'ada qaadanaysa, faah-faahin kooban oo ku saabsan adeegyada, taariikhda iyo meesha loo soo gudbinayo dalabyada danaynta ah, iyo warbixinta la rabo si loo qiimeeyo aqoonta codsadaha. Warbixinta la rabaa waxa in ay noqon doontaa inta ugu yar ee la aqbali karo si loo go'aamiyo ku habboonaanta Gudida  mana noqon doonaan qaar aad u adag ama u erayo badan taas oo niyad jabinasa la-taliyayaasha danaynaya dalabkaasi.
8) Shaqooyinka qiimahoodu uu ka hooseeyo inta bilawga ahayd ee lagu xusay Qodobka 98aad, liistada hordhaca ah waxa lagu samayn doonaa aqoonta suuqa loo leeyahay, ama ilaha kale ee warbixineed, iyada oo ay shardi tahay marka laga hadlayo hawsha leh qiyaas ahaan qiime ka hooseeya intii ugu yarayd ee loo baahnaa balse gaar ahaan aad u adag, xayaysiiskaasi dalabka ah danaynta sidoo kale waa la adeegsan doonaa.

## Qodobka 81aad
## Dalabka Codsadayaasha Qorshe "Request for Proposals"

1) Shirkadaha liistadooda la soo dhajiyay waxa loogu yeedhi doonaa in ay soo gudbiyaan codsiyada iyaga oo ku salaynaya "Codsi Dalab" (request of proposals) taas oo siin doonta tartamayaasha la soo dhajiyay iyaga oo haya warbixinta lagama maarmaanka ah si loogu awood siiyo in ay ka qayb qaataan fadhiga qandaraas bixinta iyo in ay u soo gudbiyaan codsiyo ka jawaabaya shuruudaha Gudida Qandaraasyada.
2) Dalabka codsiyadu waxa ay noqon doonaan qaabka tilmaamaha caadiga ah ee ay soo saartay Gududu  laguna liisgareeyay Qodobka 98aad waxana gaar ahaan ku jiri doona:-

a) Magaca iyo cinwaanka Gudida Qandaraasyada.
b) Nooca, xadidaada waqtiga iyo meesha adeegyada loo baahanyahay in la bixiyo, shuruudaha shaqada, hawlaha loo baahanyahay iyo wax soo saarka.
c) Shuruuda ay tahay in la adeegsado marka la qiimaynayo lanna isbarbardhigayo codsiyada iyo culayskooda marka la bar-bardhigo qiimaha.
d) Shuruudaha heshiiiska qandaraaska, iyo qaabka lagu samayn karo gacan ku haynta.
e) Tilmaanbixinta diyaarinta iyo soo gudbinta codsiyada, meesha iyo waqtiga kama danbaysta ah ee soo gudbinta codsayada;
f) Nidaamka kala xulashada ee ugu danbeeya ee la adeegsan doono;
g) Ogaysiinta xadidaada danaha is khillaafsan iyo xeerarka ka hortaga musuq-maasuqa iyo waxa is daba marinta oo ay ku jiraan xaaladaha lagaga saari karo ka qayb galista qandaraasyada alaabta, adeegyada ama shaqooyinka kaas oo ka dhalanayso natiijo ah shaqo wali socota.
h) Iyo arrimaha kale ee lagu dajin doono Wareegtooyin iyo qoraalada heer samayayaasha/dajiyayaasha ee la isku raacay ee ay soo saareen Gudidu.

3) Qiimaha laga qaadayo Codsiga Qorshayaasha waraaqaha kaliyaata waxay abuuri doonaan kharashka daabacaadda iyo qaybinta dhukumentiyada sida lagu xusay Wareegtooyinka.

## Qodobka 82aad
## Qiimaynta Tayada

1) Gudida Qandaraasyada ama hay'ada qaadanaysa la-taliyuhu waxa ay qiimayn doontaa qorshe kasta oo farsameed iyada oo adeegsanaysa gudi qiimayneed oo ka kooban saddex ama in ka badan oo khubaro ah, iyada oo tixgalinaysa dhawr qiimaynood: -

**a.** La-taliyuhu khibrada u qalanta ee uu u leeyahay hawshaasi.
**b.** Tayada qaabka la soo jeediyay.

**c.** Aqoonta shaqaalaha la soo jeediyay.
**d.** Gudbinta cilmiga, haddii ay sidaasi farayaan qodobada dib loogu noqdaa (terms of refrence). Iyo,
**e.** Illaa iyo xadka ay ka qayb galayaan muwaadiniinta ku jira shaqaalaha rasmiga ah ee qabanaya hawshaasi.

2) Qiimayn kasta waxa lagu calaamadin doonaa dhibco ka billaabma 1 illaa 100. Dabadeeto dhibcahaasi waa la miisaami doonaa si ay u noqoto tiro. Boqolayda rasmiga ah ee lambarka ee la adeegsanayo waxa uu le'ekaan doonaa hawl qabadka gaarka ah waxana ay ahaan doontaa xadiga hoos lagu sheegay. Culayska miisaan ee la soo jeediyay waa la tusi doonaa haddii ay codsadaan Qorshaha soo jeedineed.

3) Qiimaynta lagu sheegay (a), (b) iyo (c) waa khasab qiimaynta (d) iyo (e) waa qaar ikhtiyaari ah iyada oo ku xidhan shuruudaha dib loogu noqdo. Gudida Qandaraasyadu waxa kale oo ay go'aamin doontaa inta ugu yar ee u qalanta ee qorshaha soo jeedineed ee farsamo, taas oo aan ka yarayn 70 dhibcood 100kiiba. Culayska rasmiga ah waxa lagu xusi doonaa codsiga qorshaha soo jeedineed, waxana ay ahaan doontaa xadka culayska celcelis ee ay cayimi doonaan Wareegtooyinku.

4) Gudida Qandaraasyadu ama hay'adu waxa ay caadi ahaan u qaybin doontaa qiimayntani waxaanay ka samayn doontaa qiimayn hoose waxana lagu illaalin doonaa sida lagama maarmaanka ah. Haay'adu waxa ay ka digtoonaan doontaa in ay adeegsato liisas faah-faahsan oo dheer oo ah qiimaynta hoose kaas oo siinaya qiimaynta isticmaal rasmi ahaaneed oo ah qiimayn farsamo ahaaneed oo qorshe. Culayska la siinayo khibrada waxa ay ahaan doontaa mid dhexdhexaada, maadaama oo qiimayntani waqti horeba xisaabta lagu darsaday marka liiska hordhaca ah ee lataliyayaasha la soo dhejiyo. Culays badan ayaa la siin doonaa qaabka iyo xaalada ee heshiisyada aadka u adadag.

5) Qiimaynta shaqaalaha rasmiga ah ayaa lagu soo talin doonaa, maadaama shaqaalaha rasmiga ahi ay si dhamays tiran u go'aansanayaan tayada hawl qabadka, culays badan ayaa la siin doonaa qiimayntani haddii heshiiska la

soo jeediyay uu yahay mid kakan. Gudida Qandaraasyadu ama hay'adda dawladeed waxa ay dib u eegi doontaa takhasuska iyo khibrada ee shaqaalaha rasmiga ah ee la soo jeediyay iyada oo la adeegsanayo xogtooda shaksi ahaaneed (C, V), taas oo noqonaysa mid sax ah, dhamaystiran oo uu saxeexay sarkaal loo awood siiyay oo ka tirsan shirkad la-talineed iyo shakhsiga la soo jeediyay. Shakhsiyaadkani waxa lagu xaqsiin doonaa qiimayntan ka tirsan qiimayn hoosaadyada, sida ay ugu habboon tahay hawsha: -

**a)** Takhasuska Guud: warbarashada guud iyo tababarka, heerarka iyo ku habboonaanta khibrada iyo boosaska shaqaday hayaan, IWM.

**b)** Ku filnaanta Hawl-qabadka: waxbarashada, tababarka, iyo khibrada ee wadaagaha gaarka ah (specific sector), ee ku habboon hawl-qabadka gaarka ah; iyo

**c)** Khibrada uu u Leeyahay Gobolka: aqoonta uu u leeyahay luqada deegaanka, dhaqanka, habka maamulka, ururada dawladda, IWM.

6) Gudida Qandaraasyadu ama hay'adda dawladeed waxa ay qiimayn doontaa qorshe kasta oo ku salaysan ka jawaabistooda shuruudaha tixraaca. Qorshuha waxa dib loogu eegi doonaa in aanu ku habboonayn waana la diidi doonaa heerkani haddii uusan ka jawaab celinin qaybaha gaarka ah ee shuruudaha tixraaca ama uu ku guul daraysto in uu gaadho dhibcaha farsameed ee ugu yare ee loo dajiyay codsiyada qorshaha

7) Marka uu dhamaado habraacu, Gudida Qandaraasyadu ama hay'ada dawladeed waxa ay diyaarin doontaa Warbixinta Qiimayneed ee farsamada "Tayada" qorshaha. Warbixintu waxa ay noqon doontaa mid soo koobta natijooyinka qiimaynta waxana ay sifayn doontaa culayska gaarka ah iyo goldoloolooyinka qorshaha. Dhammaan diwaanada la xidhiidha qiimayntu, sida waraaqaha qofka loo calaamadiyay, waa la hayn doonaa illaa inta laga dhamaytirayo mashruuca iyo baadhisteedaba.

## Qodobka 83aad
## Qiimaynta Qiimaha

1) Ka dib marka qiimaynta tayada la dhamaystiro, Gudida Qandaraasyada ama hay'adda dawladeed ee ay khuseysaa waxa ay ogaysiin doontaa la-taliyayaasha soo gudbiyay qorshohooda codsi, dhibcaha farsamo ahaan la siiyay la-taliye kasta waxana ay ogaysiin doontaa la-taliyayaasha uu qorshohoodu aanu dhimays tirin heerka ugu hooseeya si ay u qalmitaan ama haddii loo arko mid aan ka tarjumayn codsiga dalabka qorsheed iyo shuruudaha dib loogu noqdo qorshahooda maaliyadeedna waa la soo celin doonaa iyada oo aan la furin ka dib marka la saxeexo heshiiska.

2) Gudida Qandaraasyadu waxa ay si toos ah u ogaysiin doontaa la-taliyayaasha keenay dhibcaha ugu sareeya ee u qalma, taariikhda, waqtiga, iyo goobta loo dajiyay furida qorshaha maaliyadeed. Waqtiga furidu waxa uu u ogolaan doonaa waqti ku filan la-taliyayaasha si ay uga qayb galaan furida qorshaha maaliyadeed. Qorshaha maaliyadeed waxaa loo furi doonaa si caam ah iyada oo ay joogaan wakiiladda la-taliyayaasha doortay in ay ka qayb galaan. Magaca la-taliyaha, dhibcaha farsamo iyo qiimaha uu soo jeediyay ayaa si dhawaq dheer ah loo akhriyi doonaa loona diwaangalin doonaa. Gudida Qandaraasyada ama hay'ada dawladeed ee ay khuseysaa waxa kale oo ay diyaarin doontaa dood qoraalka furitaanka dadweynaha u furan nuqul ah diwaan kaasi ayaa loo galin doonaa faylasha qandaraas bixinta waxana haddii ay codsadaan la siin doonaa la-taliyayaasha soo gudbiyay qorshaha.

3) Gudida Qandaraasyada ama hay'ada ay khuseysaa waxa ay dabadeeto dib u eegi doontaa qorshaha maaliyadeed. Haddii ay ku jiraan wax qalad ah oo dhinaca xisaabaadka ah, waa la sixi doonaa, iyada oo ay ujeedadu tahay in la is bar-bar dhigo qorshaha, kharashka waxaa loo wada badali doonaa hal lacag oo ay doorato Gudida Qandaraasyadu ama hay'adda ay khuseysaa (lacagta dalka ama waxa si dhamays tiran loogu rogi doonaa lacagta qalaad) sida lagu sheegay codsiga qorshaha. Gudida Qandaraasyadu ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay samayn doontaa isku badalka iyada oo adeegsanasa

xadiga iibka (sarifka) lacagaha oo laga soo xigtay illo rasmi ah (sida Baanka Dhexe) ama baanka ganacsiga ama jaraa'id caalamka guud ahaan laga akhristo oo ka hadla macaamilka caynkaasi ah. Codsiga kharashka waxa uu cayimi doonaa isha xadiga sarif ee la adeegsanayo iyo taariikhda sarifkaasi, iyada oo ay shardi u tahay in muddada aysan ka horayn afar todobaad oo ka horeysa xilliga muddada kama danbaysta ah ee soo gubdinta qorshaha. Aan kama danbayn taariikhda rasmiga ah ee dhicitaanka mudadaasi uu ansaxa ahaa qorshuhu.

4) Iyada oo ay ujeedadu tahay qiimayn, "qiimaha" kuma jiri doonaan cashuuraha la aqoonsan karo ee aan tooska ahayn ee heshiiska iyo cashuurta macaashal macaashka ee la siinayo dalka ay ka soo jeedo Gudida Qandaraasyadu ama hay'ada ay khuseysaa si loo bixiyo adeegyada la siiyay dalka ay u dhalatay Gudida Qandaraasyadu oo ah shaqaalaha la-taliyayaasha ah ee aan daganayn. Kharashka waxa ku jiri doona dhammaan waxa la siinayo la-taliyaha iyo kharashyada kale sida safarada, tarjumaada, daabacaada warbixinta ama kharashyada xoghayneed.

5) Codsiga qorshe ee leh qiimaha ugu hooseeya ayaa dabadeed la siin doonaa dhibco maaliyadeed oo ah 100 dhibcood qorshayaasha kalana waxa la siin doonaa dhibco maaliyadeed oo si aan toos ahayn ula siman qiimahooda. Taas badalkeeda, mid si toos ah ula siman ama hab-raac kale ayaa la adeegsan doonaa si loo qoondeeyo dhibcaha qiimaha. Qaabka la adeegsanayo waxa lagu sifayn doonaa codsiyada soo jeedimaha.

## Qodobka 84aad

## Isku Darka Qiimaynta Qiimaha iyo Tayada

1) Dhibcaha guud waxa lagu heli doonaa iyada oo la miisaamayo dhibcaha tayada iyo qiimaha iyadoo la isku darayo. Qiimaynta "qiimaha" ayaa la dooran doonaa, iyada oo la tixgalinayo kakanaanta wax qabadka iyo muhiimada gaarka ah ee tayada. Miisaamida qiimuuhu waxa uu caadi ahaan doonaa 20 dhibcood oo laga saarayo isku darka guud oo ah 100 ee ah xulashada ku salaysan tayada iyo qiimaha.

2) Qaaciidadda la iskugu darayo dhibcaha farsamo waxa lagu muujin doonaa codsiga rasmiga ah ee Qorshaha, waxayna ay ahaan doontaa iyada oo loo eegayo qaaciidada tusmada ah ee lagu cayimi doono wareegtooyinka. Shirkada hesha dhibcaha ugu sareeya isu gayn ahaan ayaa loogu yeedhi doonaa si loola gorgortamo.

## QAYBTA 11AAD
## HABABKA KALE EE XULASHADA

### Qodobka 85aad
### Xulashada ku Salaysan Tayada

1) Gudida Qandaraasyada ama hay'adda qaran ee ay khuseysaa waxa ay adeegsan kartaa Xulashada ku salaysan tayada haddii hawshu ku salaysantahay:-

a) Haddii ay tahay hawshu mid aad u adag oo aqoon sare u baahan taas oo ay aad u adag tahay in si kooban loo qeexo shuruudaha dib loogu noqonayaa loona baahanyahay in ay wax ku daraan la-taliyayaashu, taas oo la-taliyayaasha laga rabo in ay muujaan casriyayn ku saabsan dalabkooda.
a) ay leedahay saamayn aad u badan taas oo ujeedadu tahay in la helo khabiirada ugu fiican; iyo
b) loo fulin karo qaabab fara badan oo kala duwan, taas oo keenaysa in codsiyada aan la is barbar dhigi karin.

2) Xulashada ku salaysan tayada, Gudida Qandaraasyada ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay u yeedhi doontaa shirkadaha ku jira liistada hordhaca ah in ay soo gudbiyaan dalab farsamo (technical proposal) oo kali ah oo lagu qiimayn doono hab-raaca xulashada ku salaysan Tayada iyo Qiimaha shirkada keentay dalabka farsamo ee ugu heerka sareeya ayaa la waydiin doonaa in ay soo dalbadaan waxana la waydiin doonaa in ay soo gudbistaan codsiga maaliyadda (financial proposal) oo faah-faahsan si looga wada gorgortamo loona siiyo heshiiska.
3) Dhammaan xaaladaha kale ee hab-raaca xulasho waxa ay ahaan doonaan qaar la mid ah kuwa xulashada ku

salaysan Tayada iyo Qiimaha, marka laga reebo oo kali ah in qiimaha shirkada ku guulaysatay la daabaco.

## Qodobka 86aad
## Xulashada ku Salaysan Qiimaha ugu Yar

1) Qaabkani waxa kali ah oo uu ku habboon yahay xulashada la-taliyayaasha wada hawlaha soo noqnoqda ama mar kasta loo baahdo oo ay ku jiraan hantidhawranimada, ingineerada dajinta hawlaha aan adkayn kuwaas oo leh nidaamyo si fiican loo hirgashay iyo heer habsami ay jirto (standard).
2) Hab-raaca xulashada ee loo adeegsan doono qaabkani waxa uu la mid noqon doonaa kuwa loo adeegsado qaabkani waxana ay isku mid noqon doonaan kuwa loo adeegsado xulashada ku salaysan Tayada iy Qiimaha, marka laga reebo in shirkada samaysay qiimaha ugu hooseeya in la xusho.

## Qodobka 87aad
## Xulashada ku Salaysan Miisaaniyadda Xadidan

1) Gudida Qandaraasyada ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay adeegsan kartaa hab-raaca xulasho ku salaysan miisaaniyad xadidan marka ay hawshu tahay mid fudud si koobana loo qeexi karo iyo marka ay miisaaniyadu xadidantahay.
2) Hab-raaca xulashada ee qaabkani waxa ay isku mid noqon doonaan xulashada ku salaysan tayada iyo qiimaha, marka laga reebo in shirkadaha naadada looga baahan doono in ay soo diyaarshaan codsigooda maaliyadeed oo ah miisaaniyad xadidan. Miisaaniyadda xadidan waxa daaha looga qaadi doonaa dalabka qorshayaasha.
3) Codsiyada ka bata miisaaniyadda la cayimay waa la diidi doonaa.

## Qodobka 88aad
## Xulashada shirkadaha eeb ku Salaysan Aqoonta La-taliyaha

1) Qaabkani waxa loo adeegsan doonaa hawlaha aan ka badan inta ugu yar ee lagu dajiyay Qodobka 98aad, iyo

doorashada la-taliyayaasha taas oo baahida diyaarinta iyo qiimaynta codsiyo lagu tartamaa aan loo cudur daari karin.

2) sida ku cad qaabkan, Gudida Qandaraasyada ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay diyaarin doontaa shuruudaha la tixraaci doono, codsiyada danayneed iyo warbixinta ku saabsan khibrada la-taliyaha iyo ku habboonaanta hawlaha la midka ah, waxa uu samayn doonaa liistada hordhaca ah ee la dhajo, waxanu xulan doonaa shirkada leh khibrada ugu habboon iyo tixraacayada.

3) Shakhsiga ama shirkada la xushay waxa la waydiisan doonaa in ay soo gudbiso codsi wada socda oo ka kooban mid farsamo iyo mid lacageed (technical-financial proposal) dabadeetana waxa loogu yeedhi doonaa in ay kala gorgortanto heshiiska.

## Qodobka 89aad

## Xulashada La-taliyayaasha Shakhsiga ah

1) La-taliyayaasha shakhsiga ah waxa loo shaqaalaysiin doonaa hawlaha aan koox shaqaale ah looga baahnayn sidoo kale wax caawimo khibaradeed ah oo dibada ka timaada aan loo baahnayn. La-taliyayaasha shakhsiga ah ayaa loo xulan doonaa iyada oo loo eegayo khibradooda ay u leeyihiin hawshaasi. Shakhsiyaadka loo tixgaliyay is barbar dhiga khibrada waxa ay waafaqi doonaan aqoonta gaarka ah ee ugu yar kuwa la doortaana si ay ugu shaqeeyaan Gudida Qandaraasyada ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay ahaan doonaan kuwa ugu wanaangsan ee u qalma waxana ay si dhamays tiran u ahaan doonaan qaar awood u leh in ay wadaan hawshaasi. Awoodida waxa lagu qiimayn doonaa iyada oo la eegayo taariikhda waxbarasho, khibrada, iyo haddii ay ku habboon tahayna, aqoonta xaaladaha gudaha, sida luuqada wadanka, dhaqanka, habka maamul iyo qaab dhismeedka dawladda.

2) Gudida Qandaraasyada ama hay'ada ay khuseysaa waxa ay soo dhajin doontaa liistada hordhaca ah oo ah ugu yaraan saddex shakhsi waxana ay is barbar dhigi doontaa aqoontooda iyo awoodoodda gaarka ah ee

khuseysa hawsha loo dirayo qofka leh aqoonta ugu fiican ayaa loo dooran doonaa hawshaasi.
3) Shakhsiyaadka la doortay waxa la waydiin doonaa in ay soo gudbiyaan qorshe farsamo iyo mid dhaqaale waxana dabadeeto loogu yeedhi doonaa si loo gala gorgortamo heshiiska.

GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL

## Qodobka 90aad
## Xulashada ku Salaysan hal Meel

1) Gudida Qandaraasyada ama hay'adda ay khuseysaa waxa ay u adeegsan doontaa xulashada ku salaysan hal meel la taliyayaasha xaalado gaar ah oo kali ah, taas oo ah haddii nidaamkaasi si cad inoo tusayo in uu ka faa'iido badanyahay kan lagu tartamo: -

- a) Hawlaha leh qaab dabiici ah oo sii wadida hawl hore ama shaqo hore oo ay qabatay shirkadaasi;
- b) Xaaladaha gurmardka degdega ah, sida wax ka qabashada masiibooyinka iyo adeegyada latalineed ee loo baahday waqtiga wax yar uun ka danbeeya gurmadka degdega ah;
- c) Hawlaha aadka u yaryar sida lagu xusay Wareegtooyinka; ama
- d) Marka hal shirkad oo kali ahi ay buuxiso shuruudaha ama ay leedahay khibrad qiime gaar ah leh u leedahay hawshaasi.

2) Mid kasta oo ka mid ah xaaladaha lagu xusay farqadda 1aad ee Qodobkan, Gudida Qandaraasyada ama hay'ada ay khuseysaa waxa ay waydiisan doontaa la-taliyaha la xushay in uu diyaariyo codsi farsamo iyo mid lacageed (technical-financial proposal) isaga oo ka duulaya shuruudaha dib loogu noqdo ee ay siisay Gudida Qandaraasyadu, kaas oo dabadeeto laga wada gorgortami doono.

## Qodobka 91aad
## Wakiilada Qandaraas Bixinta

1) Hay'ada qandaraaska iska leh waxay isticmaali kartaa adeegyada Wakiilada Gudida Qandaraasyada si ay u fuliyaan mid ama dhammaan hawlaha qandaraasida kuwaasi oo ay fulisay Hay'adaas Qandaraas, markaa taa

lagu daro dhammaan shaqooyinkan qandaraas loo fuliyay si waafaqsan Xeerkani. Iyadoo ay shardi u tahay inay ansixiyaan Gudida Qandaraasyadu, Wakiilada Qandaraaska waxaa la isticmaali doonaa haddii gudida Qandaraaska bixinaysaa aanay lahayn awooda ay ku wadi karto qandaraas bixinta.

2) Haddii wakiilada qandaraaska ay baahato gudida bixintu waxa ay qandaraasi doontaa adeegyadan oo kale.

3) Gudida Qandaraasyadu waxa ay u tilmaami doontaa Hay'ad kasta oo Qandaraas iska leh taasi oo loo soo magacaabay inuu illaaliyo qodobada la xidhiidha ee Xeerka iyo Wareegtooyinka.

4) Wakiilka Qandaraas bixintu waxa uu u dhaqmi doonaa si adag isaga oo matalaya gudida qandaraasyada, waxana uu raaci doonaa hab-raaca qandaraaska ee lagu xusay Xeerka iyo Wareegtooyinkiisa oo ay ku jiraan isticmaalka Qoraalada Heerka Habsami ee Naadada iyo qoritaanada kale ee ay soo saarto gudidu.

### Qodobka 92aad
### Wakiilada Baadhida

Haddii wakiilo ay dawladu magacawdo si ay u fushaan baadhis ka horeysa inta aan la rarin una cadeeyaan wixii la soo dajo, gudida qandaraasyadu waxa ay adeegsan doontaa wakiilada iyada oo aan marayn hab-raac kale oo ay ku soo xulaan wakiiladaasi.

## QAYBTA 12AAD
## DAADINTA BADEECADA HA IYO QALABKA

### Qodobka 93aad
### Ogolaanshaha Daadinta

1) Sarkaalka Xisaabaadka waxa uu ugu yaraan sanadkiiba hal mar qaban doonaa Gudi Indho Indhayneed oo ka kooban ugu yaraan shan (5) ka mid ah shaqaalaha sarsare ee Haay'adaasi iyo shakhsiyaadka leh khibrad la xidhiidha si ay u baadhaan, u kooxeeyaan una qiimeeyaan waxyaabaha aan la kabi karin, xumaaday ama dheeraadka

ah iyo qalabka uguna soo warceliyaan baadhitaankooda uguna taliyaan qaabka ugu habboon ee lagu gudan karo.

2) Marka la ansixiyo talo soo jeedinta Gudida Kormeerka ee uu ansixiyo Sarkaalka Xisaabaadku alaabadaasi waa la daadin doonaa iyada oo la raacayo habraaca daadinta.

3) Gudida Kormeerku waxa ay samayn doonaan dhammaan alaabada la daadin doono qiimaha iibka loo dhigay oo lagu helay qiimayn madax banaan oo ku dhisan suuqa ama iyada oo la adeegsanayo siyaabaha kale ee macquulka ah si loo sameeyo qiimaha hadhaaga.

Haddii ay alaabadu noqdaan qaar aan la hagaajin karin sabab aan ahayn rifanka iyo lisanka macquulka ah, sida iyaga oo uu ku dhacay shil amase waqtigoodii oo dhacay, habraaca iswata oo ay sameeyeen Gudidu si loola macaamilo khasaaraha ayaa la raaci doonaa inta aysan alaabadu la qaadin ama aan la daadin.

4) Hay'ad ka mid ah dawladdu ma siin karto alaabada aan la hagaajin karrin, xumaaday ama kuwa dheeraadka ah iyo qalabka shaqaalaha Hay'adaaasi dawladeed ama xubin ka mid ah gudida kormeerka marka laga reebo sida cad ee lagu xusay farqadda 6aad ee Qodobkan.

5) Shaqaalaha Gudida Qandaraasyadu waxa ay ka qayb qaadan karaan fadhiyada badalida alaabta sida tartamayaasha iyada oo ay shardi tahay in ay dhawraan xeerasha lagu maamulo saraakiisha dawladda, qandaraaslayaasha iyo ganacsatada ee lagu dajiyay Wareegtooyinka.

6) Gudida Qandaraasyadu waxay ku wargelin doontaa Xisaabaadka Guud alaabaha la badalay si uu u ogolaado in laga saaro alaabada oo kale Diwaanka Hantida Dawladda. Xaalada Hay'adaha kale ee dawlada, Sarkaalka Masuulka ahi wuxuu hubin doonaa ka saarida alaabahan oo kale Diwaanka Hantida Hay'ada Qandaraaska.

## Qodobka 94aad
## Habraaca Badalaada

1) Badalaada badeecadda aan la badali karin, xumaatay ama badeecada dheeraadka ah iyo qalabka waxa lagu samayn doonaa qaababkan soo socda:

a) Badalaada la badalo waax dawladeed ama Hay'ad kale ee dawladeed, iyada lagu sameynayo ama aan lagu samaynayn isu dheelitir maaliyadeed haddii hanti si habboon loo isticmaali karo oo ay u isticmaali karto Haay'ad kale oo qandaraas bixisa badalaada hantida waxa ay ku dhici doontaa badalaad rasmi ah.
b) Iibka lagu sameeyo naado guud oo la siiyo tartamaha ugu qiimaha sareeya, iyada oo ay shardi u tahay sidan soo socota:
    i. Dajinta qiimaha keydka;
    ii. Xayaysiis guud oo lagu soo saaro hal jaraa'id oo dawlad oo dalka oo dhan laga akhristo oo ugu baaqaya tartamayaasha in ay badhaan arimaha una soo gudbiyaan naadooyin xidhan.
    iii. Xayaysiiska waxa lagu xusi doonaa waqtiga iyo meesha loo soo gudbinayo naadooyinka,
    iv. Wax ka yar 14 casho looma ogolaan doono inta uuna dhammaan waqtiga loo qabtay furida naadada.
    v. Naadooyinka waa la furi doonaa qiimayaashana waxa loogu dhawaaqi doonaa si furan dhammaan dadka danaynayana waxa loo ogolaan doonaa in ay ka soo qayb galaan furitaanka.
c) Iibka lagu sameeyo xaraash guud, waxa lagu xidhi doonaa: -
    i. In la dajiyo qiimaha badalaada.
    ii. Xayaysiis guud oo lagu soo saaray ugu yaraan hal jaraa'id oo dawlad oo si balaadhan loo akhristo oo ugu baaqaya tartamayaasha in ay iska eegaan alaabada kana soo qayb galaan fadhiga xaraashka.
    iii. Xayaysiiska waxa lagu xusi doonaa waqtiga iyo meesha xaraashku ka dhacayo.
    iv. Muddo aan ka yarayn 14 casho ayaa loo ogolaan doonaa inta uusan dhicin xaraashku.

d) Baabi'inta, tuuridda, gubida ama qaababka kale ee lagu tuuri karo ee ku habboon alaabta, waxa kaliya oo loo adeegsan doonaa: -

  i. Haddii hantidu ayna lahayn wax qiima ah oo ku hadhay isla markaana aan lagu wareejin karrin Hay'ad kasta oo kale ama aan loo badali karrin qaab kasta oo kale oo qiime u yeelaya.
  ii. Sababaha amaanka dawladda, danaha dawladda, caafimaadka iyo badbaadada, qadiyado sharci oo xuquuqda aadamaha ah ama badbaadinta deegaanka ah.

2) Habka daadinta/badalaada ee ku xusan farqada 1aad (d) waxaa la samayn karaa oo kaliyaata haddii ogolaansho qoran laga haysto Hay'ada ka masuulka ah Illaalinta Deegaanka.

3) Habraacyo faah-faahsan oo ku saabsan daadinta/badalaada waxaa lagu xusi doonaa Wareegtooyinka.

## QAYBTA 13AAD
## DHAGAYSIGA DIB U EEGISTA CABASHOOYINKA IYO RAFCAANADA

### Qodobka 95aad
### Xaqa Dib u-eegista

1) Tartamaha jira ama jiri kara ee sheeganaya in ay asiibtay, ama ay u badan tahay in ay asiibto, khasaare ama dhaawac ay keentay burin heshiis oo ku ay soo rogtay gudidu oo uu ku soo rogay Xeerkani, iyo wareegtooyinka lagu hirgalinayaa iyo waraaqaha naadada waxa uu doonan doonaa in dib loo eego waqti kasta oo fadhiyada qandaraaska iyada oo la raacayo Qaybtani.

2) Codsiga dib u eegista lama dhagaysan karo haddii aysan ku xusnayn falka gaarka ah, ama ka baaqsi waajib oo gaar ah, gudida Qandaraaska bixisay ee loo haysto in ay ku xad gudubtay Xeerkani ama Wareegtooyinkiisa iyo waraaqaha naadada.

3) Haddii codsiga dib u eegistu uu khuseeyo dacwad ah nidaam xumo dhacday waqtiga dalabka codsadayaasha ee qiimaynta hore, ama markii naadada loogu yeedhayay, kuwaas oo cadaa intii ka horeysay furitaanka naadada, codsiyadaasi waxa eegi doonaa kaliyaata haddii la soo gudbiyo inta ka horeysa furitaanka naadada.

## Qodobka 96aad
## Dib u Eegista uu Sameeyo Gudoomiyaha Gudida Qandaraasyada qaranku

1) Inta ka horeysa inta uusan dhaqan galin heshiisku, codsiga dib u eegista waxa la samayn doonaa marka ugu horeysa, iyada oo qoraal ah, oo ku socota gudoomiyaha gudida.

2) Gudoomiyaha Gudidu ma qaban doono codsi dib u eegiseed haddii aan lagu soo gudbin muddo dhan 14 casho ka dib marka ogaysiinta bixinta heshiiska la soo jeediyay, iyada oo la raacayo Qodobka 69aad (2) ama marka tartamaha gudbinayaa ka warhelo duruufaha keenaya cabashada ama marka tartamahaasi ogaaday xaaladahaasi ka soo horeeyaba.

3) Marka uu helo cabasho xidhiidh la leh naado fadhi kasta oo naado, gudoomiyuhu waxa uu ogaysiin doonaa ogolaanshahaasi dhammaan tartamayaasha cabanaya.

4) Gudoomiyuhu waxa uu dib u dhigi doonaa fadhiga qandaraaska waxana uu shan (5) cisho oo shaqo ka dib marka la soo gudbiyo cabashada, isagoo la tashanaya Guddida Qandaraasyada oo soo saari doonaa go'aan qoraal ah oo ka hadlaya cabashada waxana uu sheegi doonaa:-

a) Asbaabta go'aanka;

b) In cabashada qayb ahaan ama gabi ahaanba la aqbalo; iyo

c) Waxa uu sheegi doonaa talaabooyinka sixitaan ee ay tahay in la qaato meelaha ku habboon.

5) Haddii gudoomiyuhu uunu soo saarin go'aan waqtiga lagu sheegay Farqada (4), ama haddii qofka cabanaya aan lagu qancin karrin go'aanka gudoomiyaha, qofka cabanayaa waxa uu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo cabasho Maxkamadaha awoodda u leh.

### Qodobka 97aad
### Dib u-Eegista Garsoor

1) Maxkamada Sare ee JSL ayaa leh willaayada codsiyada dalbanaya dib u eegis garsoor ee go'aanada ay samaysay gudida qandaraasyadu ama gudoomiyaha ee dib u eegista cabashada.
2) Maxkamadda Sare waa in ay kaga go'aan gaadhaa dacwadaha ku saabsan qandaraasyada muddo kooban oo aan ka badnayn 21 cisho.

## QAYBTA 14AAD
## QODOBADA KALA DUWAN

### Qodobka 98aad
### Xadka Awood Qandaraas Bixinta Hay'addaha Dawlada

1) Hay'ad oo ka mid ah hay'adaha qaranka waxa ku waajib ah in ay u maraan nidaamka qandaraaska ee Guddida Qandaraasyada iib kasta, dhisme kasta, iyo adeeg kasta oo qiimihiisu ka dhan 50,000,00/= (konton milyan oo Somaliland shiling ah) iyo wixii ka badan, iyada oo masuuliyadda qandaraas bixinta ay leedahay Guddida Qandaraasyadda Qaranku.

2) Haddii iibka, dhismaha, iyo adeegu uu qiime ahaan ka yaryahay qiimaha farqada sare ku xusan, hay'adaha dawladu waxa ay awood u leeyihiin in ay ku bixiyaan iyagoo aan marayn Guddida Qandaraasyadda, iyaga oo maraya nidaamka qandaraas bixinta.

### Qodobka 99aad
### Ka Illaalinta Masuuliyada Shakhsiga ah

Qofna isaga/iyada oo ku dhaqmaysa awoodiisa, kama masuul noqon karo in dacwad ciqaab ah ama madani ah lagu soo oogo oo khuseysa fal kasta ama ka baaqsi fal oo

ku sameeyay si niyad sami ah isaga oo gudanaya masuuliyadiisa/deeda ku xusan Xeerkan.

### Qodobka 100aad
### Codsiga Warbixinta ee ay Guddidu Samaynayso

Hay'ad kasta oo qandaraas ugu jiro nidaamka waxa ay Guddidu siin doontaa warbixinta ay u baahato Hay'adu oo qoraal ah, oo la xidhiidha qandaraaska ay wado Guddida Qandaraasyaddu.

### Qodobka 101aad
### Baadhista Sharciga ah

1) Hanti-dhawraha Guud waxa uu fulin doonaa baadhis sanadle ah oo ku saabsan macaamilka Hantidhawr ee macaamilka qandaaraaska sida ku xusan Xeerka Hantidhawrka waxanu haddii sidaas laga codsado siin doonaa nuqulo ka mid ah warbixintaasi hantidhawr Maamulka.

2) Baadhista sharciyaysan ee qandaraaska hawluhu waxa ay ku tiirsanaan doontaa Guddidu si ay u qaado talaabooyin ay ku hormariso qandaraaska, badalaada ama habraaca ceshiimaynta.

### Qodobka 102aad
### Baadhista ay Fuliso Guddidu

1) Guddidu waxa ay magacaabi doontaa qof si uu baadhis ugu fuliso arrin kasta oo xidhiidh la leh macaamil fadhi qandaraas oo ay sameyso Guddida Qiimaynta Codsiyadu, ama soo gababaynta ama ku shaqaysiinta heshiiska qandaraaska haddii ay u aragto in baadhistaasi ay lagama maarmaan u tahay ama ay u tahay mid \la rabo si ay uga hortagto, ama u baadho ku xadgudub Xeerkan ah.

2) Qofka baadhista fulinayaa waxa uu, iyada oo loo eegayo farqadda 3aad ee Qodobkan: -

a) Waqti kasta oo ka mid ah saacaha shaqada ee caadiga ah, isaga oo aan bixin ogaysiin hore, waxa uu gali karaa dhismayaasha Guddida Qandaraasyadda, tartamaha, ganacsadaha,

qandaraastaha ama la-taliyaha uu khuseeyo fadhiga qandaraasku sida ku cad baadhistani.

b) Waxa ay uga baahan kartaa sarkaalka, shaqaale ama wakiil ka tirsan Hay'ada qandaraaska samaynaysa ama tartamaha, ganacsadaha, qandaraaslaha, ama la taliyaha si uu u soo saaro buugaag, diwaano, xisaabaad ama waraaqo;

c) In uu baadho dhismayaasha oo uu ka baadho buuugaag, diwaano, xisaabaad ama waraaqo;

d) In uu baadho oo uu sameeyo wixii ka baaqiya nuqulada buugta, diwaanada, xisaabaadka ama waraaqaha ee Guddida Qandaraasyada, tartamaha, ganacsadaha, qandaraaslaha ama la taliyaha.

e) In uu meesha ka saaro buugta, diwaanada, xisaabaadka ama waraaqaha Guddida Qandaraasyada Qaranka, tartamaha, ganacsadaha, qandaraaslaha ama la taliyaha illaa wakhtiga ay lagama maarmaan u tahay in la baadho iyaga ama ay sameeyaan ka soo saarido ama nuqulo iyaga ah laakiin baadhuhu waa inuu siiyaa rasiidh faahfaahsan oo buugaagta ah, diwaanada, xisaabaadka ama dhukumentiyada laga saaray.

f) Waxa uu ka dalban doonaa sarkaalka, shaqaalaha ama wakiilka Guddida Qandaraasyada Qaranka ama tartamaha, ganacsadaha, ama qandaraastaha ama la taliyaha;

   I. In ay sharaxaad ka bixiyaan qoraalada buugta ku jirta, diwaanada, xisaabaadka ama waraaqaha; iyo

   II. In ay siiyaan baadhaha warbixinta khuseysa maamulka ama hawlaha Hay'ada qandaraaska bixinasa ama tartamayaasha si macquula looga baahan karo.

3) Awoodda galida iyo baadhista ee lagu xusay farqadda 2aad (a) iyo (c) ee Qodobkani lama adeegsan karo haddii aysan jirin sabab macquula oo lagu rumaysan karo in ay lagama maarmaan u tahay in la adeegsado awoodahaasi si looga hortago, loo baadho ama loo xidho danbi ama si loo helo cadayn xidhiidh la leh danbi.

4) Qof kasta oo, isaga aan u haysan sabab macquula, qariya ama u diida qofka baadhista samaynaya ee adeegsanaya shaqada ku xusan qodobkani waxa uu galay danbi.

**Qodobka 103aad**
**Habraaca lagu Dhamaystirayo Baadhista**

1) Qofka baadhista wadaa waxa uu: -

a) Siin doonaa nuqul ka mid ah warbixinta baadhista Guddida;

b) Waxa uu u diri doonaa gababada iyo gun-gaadhka baadhistiisa iyo talo soo jeedintiisaba Guddida Qandaraasyada Qaranka iyo tartame kasta, ganacsade kasta, qandaraasle kasta ama la-taliye kasta kaas oo shaqadiisu ay baadhis ku jirtay.

2) Guddidu waxay, haddii lagu qanciyo in uu jiray ku xadgudub Xeerkan ahi ama xeer kasta oo kale oo xidhiidh la leh fadhiyada qandaraasida ama heshiisyada qandraasida, waxa uu qaadi doonaa fal si uu u ansixiyo ku xadugubdka shaqadaas oo ay ku jiri doonto: -

a) In la tirtiro fadhiyada qandaraaska;

b) Tirtirida heshiiska qandaraaska;

c) Ansixinta wax kasta oo la qabtay oo xidhiidh la leh fadhiyadaas; ama

d) Cadayn waafaqsan qodobada la tacaluqa ee Xeerkani.

3) Guddidu waxa ay qofka siin kartaa fursad ku filan oo uu ku diyaarsado in uu ka doodo arinka, inta uusan

qaadin wax talaabo ah sida ku cad farqada 2aad ee Qodobkan taas oo saamayn xun ku yeelan doonta xuquuqda ama hantida qofkaasi.

## Qodobka 104aad
## Danbiyada la Xidhiidha Xeerkani

Qof kasta oo ku xadgudba qodob ka mid ah Xeerkani waxa uu galay dambi, iyo qofka ay dambi ku heshay Maxkamad Sharci ahi waxa ciqaabtiisa loo raaci doonaa Xeerka Ciqaabta Guud iyo Xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 105aad
## Helitaanka Dadweynaha

Gudidu waxa ay hubinayaan in go’aamada Guddidu Qandaraasyadu ay sameynayaan iyo awaamiirta Guddidu ee leh adeegsiga Guud sida ku Xusan Xeerkani in si dhamaystiran looga dhigay qaar ay heli karaan dadweynuhu.

## Qodobka 106aad
## Wax ka-bedel iyo Laalis

Marka uu dhaqangalo Xeerkan, Xeerkan wuxuu laali doonaan dhamaan Xeerarka kale ee la xidhiidha qandaraaska dawladda.

## Qodobka 107aad
## Qodobada Ku Meel Gaadhka ah

1) Hay’adaha Qandaraaska ee ku lug leh qandaraasyada aan dhammaan ee degdega ah ka hor intaanu dhaqan gelin Xeerkan wuu socon doonaa waanu dhamaystiri doonaa qandaraasyadan oo kale, iyada oo aan loo eegayn dhaqangalka Xeerkan.

2) Marka loo eego farqadda 1aad ee Qodobkan haddii aragtida Guddida, ansaxsanaanta heshiiska ee sii socotaa ama shay la qabtay ama uu sameeyey urur uu ku xadgudbo xeer uun, Guddidu waxay qaadi karaan talaabooyinka muhiimka ah ee lagu saxayo iswaafaqla’aanta illaa xadka la aqbali karo oo waafaqsan Xeerkan.

### Qodobka 108aad
### Wareegtooyinka/Xeer Nidaamiyayaasha

Guddida Qandaraasyada Qaranku waxa ay soo saari karaan wareegtooyin, xeer-nidaamiye, hagayaal iyo qaab-beeg (formats), aan ka hor imaanayn Xeerkan oo loo isticmaalo nidaamka qandaraas bixinta.

### Qodobka 109aad
### Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiiladu, Madaxweynuhuna saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha G/Wakiilada JSL.**